

COLUMBUS CITY SCHOOLS




Start Strong. End Stronger!

2023-2024 SCHOOL YEAR

# Hagaha/Tusaha Guusha Ardayga





Daabacaadan waxay ka kooban tahay macluumaad muhiim ah oo loogu talagalay in lagu caawiyo ardayda si ay u helaan sanad-dugsiyeed guulaysta.



# Soo dhawaynta Kormeeraha Guud

Ku soo dhawoow sanad-dugsiyeedka 2023-2024!

Aniga oo eegaya sanadka cusub ee fooda inagu soo haya, waxaan ku faraxsanahay fursadaha aan dhamaadka lahayn ee sugaya ardaydeena, qoysaska, shaqaalaha, iyo dhamaan bulshada magaalada Columbus. Degmada oo dhan, qiirada ka danbaysa ka go'naanshiyaha aynu wadaagno ee hagida iyo xoojinta ardayda, labaduba gudaha iyo dibadda fasalkaba, ayaa si cad u muuqda.

Himiladeena sannad-dugsiyeedkan waa "Bilow Xooggan. Leh dhammaad Xoog badan. Fariintani waxa ay ka hadlaysaa rayn-rayn iyo rajada aanu wadno maalinta koowaad ee dugsiga. Inta aan ku guda jirno sannad-dugsiyeedka, waxa aan xasuusannahay in aan siyaabo kala duwan u xoogaysan karno. Bilaabidda xooggan waxay la macno tahay in aan isku dayno sida ugu fiican maalin kasta oo aan ogaanno in sida ugu wanaagsan ay u ekaan karto mid kasii duwan maalin kasta. Meel kasta oo aan ka bilowno, waxaan leenahay awood aan ku dhammayn karno xitaa si ka sii xoog badan, gaar ahaan marka aan sii wadno kor u qaadida midba midka kale, una dabbaaldegno guulihii waaweynaa iyo kuwii yaraa, oo samee xusuus waarta.

Hagahan daabacaadda Guusha Ardayga waxa ay bixinaysaa dulmar guud oo ku saabsan siyaasadaha muhiimka ah ee ay dejiyeen Guddida Waxbarashadu, iyo sidoo kale qawaaniinta iyo habraacyada loogu talagalay in lagu hubiyo jawi waxbarasho oo bad-qab leh oo kobcinaya dhammaan ardayda iyo shaqaalaha. Dukumiintigan waa in si taxadar leh loo akhriyaa, sidoo kale waxaa laga geli karaa mareegaheena/websaydadeena si loo tixraaco wakhti kasta.


Marka ay diiraddaadu dib ugu soo noqoto fasalka, xusuusnow in guusha aan lagu qeexi karin darajooyinka ama buundooyinka imtixaanka oo keliya. Waxay ku saabsan tahay dabeecadda, adkeysiga, iyo kartida la qabsiga caqabadaha soo socda. Tilmaamahani waxay u qaadi doonaan aqoonyahannadeena guulo aad uga sii fog Dugsiyada Magaalada Columbus.

Waad ku mahadsan tahay doorashadaada Dugsiyada Magaalada Columbus, waxaana rajeynayaa sanad ay ka buuxaan farxad, korriin, iyo guulo aan la soo koobi karin.

Si daacadnimo leh,

Dr. Angela Chapman
Kormeeraha Guud/
CEO gudoomiyaha Guud








## HADAFA/HIMILADA

Arday kastaa waa mid aad wax u bartay, una diyaarsan hogaaminta iyo adeega, waxaana awood loo siiyay in uu ku guuleysto muwaadin ahaan bulshada caalamka dhaxdeeda.



# Shaxda Tusmada


Warqad ka socota Kormeeraha Guud 2
Bayaanka Hadafka/Himilada 3
Guddiga Waxbarashada Dugsiyada Magaalada Columbus 4
Ogeysiin ku socota Waalidiinta Aqoonta Ingiriisigu Kooban-tahay (LEP) 5
Taageerada Faragelinta Hab-dhaqanka Wanaagsan 6
Xuquuqaha Ardayda & Waalidiinta 7
Taageerada Dhammaan Ardayda 8
Ardayda & Qoysaska ku jira waqtiga Kala-guurka 8
Siyaasadaha & Tilmaamaha Guddiga Waxbarashada Columbus 9-20
- Dulqaad La'aan 9
- Ka-hortagga Xadgudubka, hababka cabashooyinka 9-10
- Xadgudubka Galmada 11
- Caga-jug-leyn, Xadgudubka iyo Cabsi-galin 12
- Jawaabaha Deg-degga ah/ Maareynta Dhibaatada 13
- Kaararka Guusha Ardayga 13
- Xeerka Dugsiga Ka Xor-tagga Hubka 13
- Qiimaynta Caafimaadka 14
- Xasaasiyadda cuntada 14
- Deegaanka Ka madax-bannaan Tubaakada/ Buuriga 14
- Imaanshaha 15
- Xeerka Lebbiska ardayga 16
- Adeegsiga Siyaasadda La oggolaan karo 17-19
- Tilmaamaha Anshaxa/ dbinta Carruurnimada Hore 20

Heerarka Faragelinta Hab-dhaqanka iyo Xeeladaha (dulmar) 20-21
Su'aalaha Akadeemiyadda Dijitaalka/Internet-ka 21
Soo koobidda Istaraatiijiyadaha/ Xeeladaha iyo Natiijooyinka 22
- Heerka I: Hab-dhaqanka iyo Istaraatiijiyadaha/ Xeeladaha Faragelinta 23
- Heerka II: Hab-dhaqanka iyo Istaraatiijiyadaha/ Xeeladaha Faragelinta 24
- Heerka III: Hab-dhaqanka iyo Istaraatiijiyadaha/ Xeeladaha Faragelinta 25

Ciwaanka VI, IX iyo Qaybta 504; Waxbarashada Gaarka ah; Helitaanka Ilmaha 26
Saxiixa Foomamka Waalidka iyo Ardayga 27-30
- Saxiixa Foomka Waalidka Ardayga 27
- Foomka Adeegsiga Internet-ka La ggolaan Karo 28
- Foomka Is-afgaradka/Is haysta ee Waalidka-Ardayga-Dugsiga 29

CalendarJadwalka Sannad-dugsiyeedka 30
Caadiga ah ee 2023-2024 31

# Guddiga Waxbarashada Dugsiyada Magaalada

Guddiga Waxbarashada Dugsiyada Magaalada Columbus (Sawirka hoose) waxay qaateen siyaasado la xiriira hawlaha ardayda, hab-dhaqanka ardayga, iyo anshaxa/edebta ardayda ee ku salaysan hab-dhaqanka ugu wanaagsan, iyo sidoo kale sharciyada gobolka iyo federaalka ee jira.

Ardayda, waalidiinta, iyo xubnaha shaqaalaha ayaa sidoo kale laga filayaa inay si buuxda u bartaan xeerarkan, tilmaamaha iyo habraacyada dhismaha dugsiga.

Intaa waxaa dheer, ka saarista, cayrinta, eryida iyo habraacyada rafcaanka ayaa lagu dhajiyay meel muuqata oo ku taal dhismo kasta oo ku yaala xafiiska weyn waxaana la heli karaa marka la codsado.

Kulamada shaqada caadiga ah ee Guddiga Waxbarashada Columbus waxaa la qabtaa Talaadada koowaad iyo saddexaad ee bil kasta, saacada 6:00 p.m., ee fiidnimo. Kulamada guddiga waxaa lagu qabtaa Dhismaha Maamulka Degmada, ee 3700 S. High Street, Qolka 825, iyo gudaha dugsiyada ama meelaha kale iyada oo horay loo sii sheego. Shakhsiyaadka xiisaynaya inay wax dhahaan Guddida waa inay marka hore is-diiwaan-geliyaan iyaga oo wacaya Xafiiska Xiriirka Macaamiisha 614-365-8888, markay tahay 3:30 p.m., galabnimo maalinta shirka.



Laga bilaabo bidixda ilaa midiggta: Dr. Tina D. Pierce, Carole Beckerle, Eric S. Brown, Madaxweyne ku xigeenka Ramona R. Reyes, Madaxweyne Jennifer Adair, Michael Cole, iyo Christina Vera

## Guddiga Waxbarashada Columbus:

- Waxay taageertaa guusha tacliinta, horumar joogto ah, maamulida bulshada madaniga ah, iyo waxbarashada nolosha-waarta.
- Si wada jir ah oo xilkasnimo ku jirto ayaa si daacadnimo leh wax ugu maamulaan.
- Waxay u-muujinaa naxariis, ixtiraan, iyo kalsooni kuwa aan u adeegno.
- Wuxuu qiimeeyaa ka qaybgalka bulshada iyo xoojinta, iyo sidoo kale sinnaanta iyo kala duwanaanta.

COLUMBUS CITY SCHOOLS

# Notice to limited English Proficient (LEP) Parents

Free language assistance is available to Columbus City Schools parents regarding school programs and activities. A parent does not have to be of limited English proficiency in speaking, reading, writing, and comprehending English in order to be considered Limited English Proficient (LEP), but rather it is only necessary that a parent be limited in at least one of these areas in order to be eligible to receive language assistance as needed. No other verification is necessary in order to receive language assistance. Services may be requested for, but not limited to the following events: parent teacher conferences, disciplinary hearings, IEP meetings, and 504 meetings. Please be advised that while parents may bring family members and friends to all school activities and meetings, the District shall be responsible for providing any necessary interpreting or translating services. For assistance, please contact the ESL Department at 614-365-8802.

# AVISO PARA LOS PADRES LEP
## (Notice to LEP Parents – Spanish)

Asistencia gratuita con el idioma está disponible para los padres de las Escuelas de la Ciudad de Columbus con respecto a actividades y programas escolares. Un padre no tiene que tener un dominio limitado del inglés en hablar, leer, escribir y comprender el inglés con el fin de ser considerado con Dominio Limitado del Inglés (LEP), sino que sólo es necesario que un padre esté limitado en al menos una de estas áreas para poder recibir ayuda con el idioma inglés según sea necesario. No es necesario ninguna otra verificación para recibir ayuda con el idioma inglés. Los servicios pueden ser solicitados, pero no limitados para los siguientes eventos: conferencias de padres – maestros, audiencias disciplinarias, reuniones IEP, y reuniones 504. Por favor tenga en cuenta que aunque los padres traigan familiares y amigos a todas las actividades escolares y reuniones, el Distrito será responsable de proveer los servicios necesarios de interpretación o traducción. Para obtener ayuda, por favor contactar al Departamento de ESL al 614-365-8802.

# OGEYSIIS KU SOCDA WAALIDIINTA AQOONTOODA INGRIISKA YARTAHAY
## (Notice to LEP Parents – Somali)

Caawimaad lacag la'aan ah ayeey waalidka ka helayaan Columbus City Schools oo ku saabsan hawlaha barnaamijyada skuulka. Waalidka khasab kuma aha in ay ingriiska si fiican ugu hadli karaan, qori karaan, akhrin karaan ayna fahmi karaan si loo tix geliyo aqoontooda yare e luqada ingriisk (LEP) , hase yeeshee muhiimadu waxeey tahay waa in uu wax un ka yaqaanaa si loogu ogolaado markuu u baahdo caawimaad. Cadeymo kale uu ku helo caawimaada luqada uma baahna. Waxaa loo ogolyahay in ay adeegyo dalbadaan, laakiin kama xadidna dhacdooyinkaan soo socda: parent-teacher conferences, disciplinary hearings, IEP meetings, iyo kulamada 504 Fadlan ogsonow waalidiinta waxeey soo wadan karaan inteey socdaan hawlaha iyo kulamada dad qoyskooda ka tirsan iyo saaxiibo, Gobolka (district) ayaa mas'uul ka noqonaya in ay siiyaan hadeey u baahdaan adeegyada turjubaanka. Wixii caawimaad ah, fadlan la soo xiriir Qaybta ESL ka aad ka heli kartid 614-365-8802.

# अङ्ग्रेजी भाषामा सीमित दक्षता भएका अभिभावकहरूलाई सूचना
## (Notice to LEP Parents- Nepali)

विधालयका विभिन्न कार्यक्रम र गतिविधिहरू सन्दर्भमा कोलम्बस सिटी स्कूलले अभिभावकहरूका लागी निशुल्क अंग्रेजी भाषा सहायता उपलब्ध गराउँदछ।अभिभावकहरूले अंग्रेजी भाषा बोल्नने, पढ्ने, लेखन वा बुझ्न सक्नु हुन्न भने यो कार्यक्रमको लागी योग्य हुनु हुने छ।तपाईले निम्न उल्लेखित वा अन्य कुराहरूको लागि विधालयमा यो सेवा अनुरोध गर्न सक्नु हुने छ। जस्तै: अभिभावक-शिक्षक सम्मेलन, शास्त्रीय सुनवाई, IEP सभा, र 504 सभाहरू आदि।कृपया तपाईहरूले सबै विधालय गतिविधिहरु र बैठकहरूमा परिवारका सदस्य र साथीहरू ल्याउन सक्नु हुने छ। जिल्लाले कुनै पनि आवश्यक व्याख्या प्रदान वा सेवाहरू अनुवादका लागि जिम्मेवार हुने छ।सहायताको लागि ESL विभागको फोन न.614-365-8802 मा सम्पर्क गर्ननुहोस्।

# Avis aux parents LEP
## (Notice to LEP Parents – French)

Une assistance linguistique est disponible pour les parents des élèves de Columbus city Schools pour les programmes et les activités de ses écoles. Un parent n'a pas besoin d'une maîtrise limitée pour s'exprimer, la lecture, l'écriture, ou la compréhension pour être considéré comme ayant une maîtrise limitée de l'anglais (LEP), mais il est seulement nécessaire qu'un parent soit limité à au moins un de ces domaines afin de pouvoir recevoir une aide linguistique si nécessaire. Aucune autre vérification n'est nécessaire pour bénéficier d'une aide linguistique. Les services peuvent être demandés, mais non limité à l'occasion des événements suivants: conferences parents-enseignants, les audiences disciplinaires, réunions IEP et 504. Veuillez noter que même si les parents peuvent amener des membres de leur famille et amis à toutes les activités scolaires et les réunions, le district est responsable de fournir les services d'interprétation ou de traduction. Pour obtenir de l'aide, veuillez contacter le Département d'ESL au 614-365-8802.

# اعلام للاهالي الذين تكون لغتهم الانكليزية محدودوة LEP
## (Notice to LEP Parents – Arabic)

المساعدة المجانية للغة الانكليزية موفرة للاهالي الذين لديهم طلاب و طالبات في مدارس مدينة كولمبوس فيما يتعلق بالبرامج و الانشطة المدرسية .ليس من الضرورة للاهالي ان تكون اجادتهم محدودة باللغة الانكليزية في التكلم ,القراءة ,الكتابة و تفهم اللغة من اجل ان تعتبر اللغة الانكليزية محدودة الجودة و لكن من الضروري ان يكون الاهالي لديهم حدود في واحدة او اكثر ليكونوا مؤهليين لتصلهم المساعدة في اللغة الانكليزية اينما تحتاجوها .و ليس هناك ضرورة لاي اثبات اخر من اجل ان تصلك المساعدة باللغة الانكليزية .و يجب ان تقدم طلب الخدمة للمساعدة باللغة الانكليزية في بعض الاحداث: اجتماع الاباء مع المدرسين ,الجلسات التادبية ,اجتماع برنامج الثقافة الفردية ,اجتماع 504 , من فضلك :ينبغي ان ينصح انه اذا كان الاباء يجلبون افراد العائلة او الاصدقاء لكل الانشطة المدرسية و الاجتماعات ,المقاطعة ستكون مسؤولة لتزود اي خدمة ترجمة ضرورية للمساعدة من فضلك اتصل بقسم اللغة الانكليزية كلغة ثانية 8802-356-614

# Fadlan la akhri oo dib ula eeg Hagahan Ilmahaaga.

Waalidiin ahaan iyo mas'uuliyiin ahaan, markaad u sameysataan xudduudaha oo aad u dejisaan rajooyinka carruurtaada, waxaad ka caawinaysaan inaad hubisaan inay u badan tahay inay u dhaqmaan si habboon oo ay ugu guuleystaan dugsiga. Waxaan ballan qaadeynaa inaan si firfircoon kuula shaqeyno si aan u abuurno sannad-dugsiyeedka bad-qab leh, xiiso leh oo guul tacliineed u-leh ilmahaaga.. Innaga oo wada shaqaynayna, waxaan ka caawin karnaa ilmo kasta inuu gaaro kartidiisa ama kartideeda.

Waxaan jeclaan lahayn fikradaada iyo ka qayb-qaadashadaada. Fadlan nagala soo xiriir xafiisyadeena dugsiga haddii aad qabto wax su'aalo ah ama aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah.



# HAGAHAN WAXA UU KHUSEEYAA

- Dhulalka dugsiga ka hor, inta lagu jiro saacadaha dugsiga iyo ka dib;
- Waqti kasta oo kale oo dugsiga ay adeegsanayaan koox dugsi;
- Bannaanka dhulalka dugsiga oo ay ka socdaan hawl dugsiyeedka, shaqado ama dhacdo;
- Baska dugsiga gudihiisa, baabuur uu dugsigu maal-galiyay, ama joogsiga baska Dugsiyada Magaalada Columbus iyo waxa la xiriira dhammaan hantida iyo gaadiidka Degmada;
- Mar kasta oo arday ka tirsan Dugsiyada Magaalada Columbus uu matalo dugsigiisa; dugsigeeda iyo
- Had iyo jeer mar kasta oo anshaxa ardaygu la xiriirto hawlaha dugsiga ama dugsi.

## TAAGEERADA FARAGELINTA HAB-DHAQANKA WANAAGSAN (PBIS)

Taageerada Faragelinta Hab-dhaqanka Wanaagsan (PBIS) waa nidaam ay taageerto Waaxda Waxbarashada Ohio iyo Dugsiyada Magaalada Columbus si kor loogu qaado oo loo kordhiyo guusha tacliinta iyo kartida hab-dhaqameedka. Waa nidaam saddex geesood ah oo taageero ah oo lagu caawinayo dhammaan ardayda si ay u gaaraan yoolalka muhiimka ah ee dareen-bulsho iyo waxbarasho. Waxaan ognahay in marka aan abuurno jawi waxbarasho oo udub dhexaad u ah ardayda, hufan oo xasiloon, ardaydeenu waxay ku fiicnaadaan waxbarashadooda.

Iyada oo qayb ka ah PBIS, waxaanu dhisi doonaa oo si cad u bari doonaa shuruuc cad iyo hab-dhaqanka laga filayo ardayda. Waxaan dhiirigelineynaa oo aan aqoonsannahay hab-dhaqameedyada la rabo. Rajooyinka laga filayo dhammaan hab-dhaqanka ardaygu waxay ku caddahay meelaha la wadaago ee dhismaheenna oo dhan iyo meelaha baabuurta la dhigto iyo garoommada lagu ciyaaro.

Xeerarka dugsigu waxay bixiyaan jawi dugsi oo ammaan ah waxayna u oggolaadaan waqti dheeraad ah oo wax lagu baro. Waxaan codsaneynaa natiijooyin joogto ah iyo xoojinta wanaagsan ee dhammaan ardayda. Anaga oo faahfaahin ka bixinayna hab-dhaqan kasta oo la filayo oo aan ardayda u barno si wanaagsan, firfircooni leh, waxaanu siinaa luuqadda caadiga ah qof kasta oo degmadeena ah, oo ay ku jiraan ardayda, macalimiinta, shaqaalaha xafiiska hore, iyo xirfad-yaqaannada.

Waxaan aaminsannahay in lahelo aragti midaysan iyo qiyamka, luuqadda iyo waayo-aragnimo u ogolaanaysa bulshada dugsigeena inay dhisaan oo ay joogteeyaan jawi ay ardaydu ku guulaysan karaan kuna koraan.

Hagahan waxa uu bixinayaa rajooyin cad oo laga filayo hab-dhaqanka ardayga, waxa uu qeexayaa habab gaar ah iyo xeelado lagu dhiirigaliyo xirfadaha bulshada, iyo liiska xeeladaha wax lagu saxayo marka dhaqan xumo dhacdo.

Aragtida iyo Qiimaynta Guud

Luuqadaha Guud

Waayo-aragnimada Guud

## Talaabooyinka ay Qaadayaan Maamulahaaga Iyo Shaqaalahaaga Dugsiga Si ay U dhisaan Cimilo Wanaagsan:

- Dhisidda cilaaqaadka iyo xiriira daryeelka dabeecadda.
- Awood siinta ardayda.
- Abuurista cimilo wada shaqayneed.
- Bixinta deegaan nabdoon oo bad-qab ah.
- Qaabka loo baro sida mas'uul loo noqdo.
- Dhisidda kalsoonida u-dhaxaysa ardayda iyo shaqaalaha.
- La xiriiridda rajooyinka sare laga filayo ardayda.
- Bar oo muuji ixtiraan iyada oo la adeegsanayo xeelado kala duwan oo ah bulsho/ dareen barasho.
- Ka caawinta ardayda in ay dhidibada u taagaan oo ay muujiyaan hab-dhaqan wanaagsan maalin kasta.
- Taageerista wada xiriirka joogtada ah ee waalidiinta, mas'uuliyiinta, iyo bulshada.
- Ku dhiiri gelinta waalidiinta iyo xubnaha bulshada inay noqdaan bah-wadaag.
- Barista sida loo maareeyo isku dhaca iyo horumarinta xirfadaha bulshada.
- Bar, qaabka iyo dhiirigelinta hab-dhaqameedyada la filayo.

## XUQUUQAHA ARDAYDA IYO WAALIDIINTA

Dugsiyada dadweynaha, waalidiinta iyo ardaydu waxay leeyihiin xuquuqo gaar ah oo ay bixiyaan sharciyada federaalka iyo kuwa gobolka.

Guddiga Waxbarashada Columbus waxay qaataan habraacyada iyo siyaasadaha ku salaysan sharciyadan federaalka iyo gobolka. Sidaas awgeed, xuquuqda gaarka ah ee ardayda waxaa lagu miisaamayaa inta badan bad-qabka iyo daryeelka  ardayda dugsiyada.



## Arday kasta iyo Waalid kasta oo ka mid ah Dugsiyada Magaalada Columbus Waxay Xaq U-leeyihiin Nidaamka Sharciga(Due Process of Law)

Iyada oo la raacayo Sharciga Guuleysiga Arday kasta (ESSA) iyo Xeerka Ohio oo Dib Loo eegay (Ohio Revised Code) (ORC) 3319.074 ee ku saabsan sharciga khuseeya aqoonta xirfadeed ee macalimiinta, waalidiintu waxay xaq u leeyihiin:

1. Codsi ah aqoonta xirfadeed ee macalimiinta iyo xirfadlayaasha ilmahaaga;
2. Helitaanka heerka waxqabadka qof-ahaaneed ee qiimaynta ilmahaaga ee gobolka oo dhan iyo kaarka warbixinta qof-ahaaneed ee kuu ogolaanaya inaad ogaato sida uu u horumarayo ilmahaagu;
3. Helista ogeysiis qoraal ah afar toddobaad oo isku xigta ka dib, haddii macalinka ilmahaagu aanu si sax ah shati u haysan; iyo
4. Codsiga siyaasadaha ku saabsan ka-qaybgalka ardayga ee qiimaynaha gobolka ee waajibka ah.

Kahor intaan ardaygu dugsiga laga joojin, ardaygu wuxuu xaq u leeyahay inuu helo ogeysiis qoraal ah oo ku saabsan sababta ka joojinta loogu talagalay iyo fursad dhageysi aan rasmi ahayn.

Kahor intaan ardayga la saarin, ardayga iyo waalidku waxay xaq u leeyihiin inay helaan ogeysiis qoraal ah oo ku saabsan sababta cayrinta la soo jeediyay iyo fursad dhageysi rasmi ah.

Labada xaaladood, waalidiinta waxaa la siin doonaa fursad ay kaga doodaan tallaabada anshax-marinta.

## Markaad tahay Ardayga Dugsiyada Magaalada Columbus, Waxaad Xaq U leedahay inaad wax ka Fisho/ka Filato:

- Waxbarasho lacag la'aan ah oo ay ku jirto jawi waxbarasho wanaagsan;
- In dugsiga aad dhigto uu ahaan doono meel ammaan ah;
- In aan lagugu samayn doonin takoor/cusuriyad; iyo
- In lagugu wargelin doono dhammaan sharciyada iyo xeerarka dugsiga.

## XUQUUQAHA ARDAYDA & WAALIDIINTA (sii socota)

**Markaad tahay Ardayga Dugsiyada Magaalada Columbus, waxaad kusaaran Mas'uuliyad Qof ahaaneed oo ah:**

- Inaad ogaato ood raacdo shuruucda iyo xeerarka Dugsiyada Magaalada Columbus;
- Samee qaybtaada si aad jawi wanaagsan uga abuurto dugsigaaga adiga oo ka shaqaynaya xagga sareynta tacliinta, ku dadaalaysa imaanshaha saxda ah, iyo ka qayb-qaadashada hawlaha dugsiga;
- Xushmee/ixtiraan sharafta iyo qiimaha naftaada, ardayda saaxiibada ah, macalimiinta iyo shaqaalaha dugsiga;
- Xushmee/ixtiraan awoodda macalimiinta, maamulka dugsiga iyo shaqaalaha kale ee loo idmaday ilaalinta anshaxa/edebta;
- U dhaqan si aan lahay carqalad gelin nidaamka waxbarashada ama u aan uhorseedi karin dhaawac jireed ama dhaawac xagga dareenka ah; iyo
- Baro xirfadaha-xalinta-dhibaatada si aad si wax ku ool ah u maareeyso xaaladaha isku dhaca adoo iskudayaya inaad iska ilaaliso ixtiraan la'aanta iyo hab-dhaqamada waxyeelada leh.

Tusaalooyinka dembiyada ku taxan inta lagu guda jiro Tusaha/Hagaha Guusha Ardayga looguma talagelin inay noqdaan liis dhammaystiran oo dembiyo ah oo keeni kara tallaabo anshaxeed/edbineed.

Fal kasta oo carqalad ku ah waxbarashada oo khatar ku ah nidaamka iyo bad-qabka ardayda iyo deegaanka dugsiga waxaa loo eegi doonaa tallaabo anshaxeed/edbineed.

Sidoo kale, xuquuqaha ardayga ee ku saabsan go'aannada khuseeya baaritaanada lagu sameeyo dadka ama hantida waxaa lagu dheeli tiri doonaa mas'uuliyadda dugsiga si loo ilaaliyo bad-qabka iyo daryeelka dhammaan ardayda.

**FIIRO GAAR AH: Sanduuqyadu waa hantida nidaamka dugsiga, Amaah/deyn ku meel gaar ah ayaa ardayda lagu siiyay, waxaana mar kasta oo ay doonaan shaqaalaha dugsigu baaritaan ku samayn karaan.**

### TAAGEERADA DHAMAAN ARDAYDA

Dugsiyada Magaalada Columbus waxaa looga baahan yahay inay aqoonsadaan hal meel oo lagala soo xiriiro dhallinta ay haysato hoy la'aanta, ku lug leh nidaamka daryeelka korinta, ama nidaamka cadaaladda dhallinta. Meel kasta oo lagala xiriiro ayaa mas'uul ka noqon doonta la xiriirka shaqaalaha iyo wakaaladaha kala duwan ee ku saabsan meeleynta ardayga, diiwaanada, qorsheynta kala guurka, isku xirka wakaaladaha maxalliga iyo gobolka, iyo shaqada kale ee u doodista ee la xiriirta baahiyaha waxbarasho ee ardayga si loo xaqiijiyo guushooda.

### ARDAYDA & QOYSASKA KUSUGAN LAALAD KU MEEL GAAR AH (Hoy-laawayaasha, Daryeel korinta, iyo Ku lug-lahaanshaha Cadaaladda Dhallinta)

Dugsiyada Magaalada Columbus waxay siiyaan taageerooyin gaar ah ardayda ku lug leh daryeelka korinta, nidaamka cadaalada, iyo/ama kuwa ay la kulmaan hoy la'aan. Xiriiriye degmo oo u-go'an ayaa jira si uu gacan uga geysto xaqiijinta xuquuqda waxbarasho ee carruurta iyo dhalinyarada ee ay degmadu mas'uul ka tahay. Xeerka Caawinta Hoy-la'aanta ee McKinney-Vento iyo Xeerka Guullaha Arday Kasta (ESSA) ayaa ah hagaha/tusaha adeegyada la bixiyo. Shaqaaluhu waxay go'aamiyaan u-qalmitaanka qoyska ee adeegyada, waxayna la shaqeeyaan waalidiinta, dugsiyada, wakaaladaha bulshada, iyo degmooyinka ku xeeran si loo hubiyo in arday kasta oo ku jira kala-guurka, fasallada Pre-K ilaa 12-aad, uu u-helo fursad buuxda oo siman oo uu ugu guuleysto dugsiga.

Shaqaalaha barnaamijku waxay ka shaqeeyaan inay bixiyaan gargaarka baahiyaha sida:

- Xulashada iyo diiwaangelinta dugsiga (Go'aaminta Xiisaha ugu Wanaagsan-BID)
- Gaadiidka dugsiga
- Agabyada dugsiga ee ardayda
- Wax ka qabashada caqabadaha saameeya imaanshaha dugsiga iyo ka qayb-galka buuxda
- Helitaanka dukumiintiyada lagama maarmaanka ah sida shahaadooyinka dhalashada, diiwaanka dugsiga, iyo diiwaanada caafimaadka
- Qoraal ah/dib uga soo kabashada dhibcaha iyo xaqiijinta
- Wadashaqeynta hay'adaha ilaalinta carruurta ee deegaanka
- Xallinta khilaafka



**Juvenile Justice Liaison**
**Timothy Nared**
Central Enrollment Center
430 Cleveland Avenue
Columbus, OH 43215
380.997.0894
https://www.ccsoh.us/domain/4177

**Foster Care Liaison**
**Ivy Mitchell**
Central Enrollment Center
430 Cleveland Avenue
Columbus, Ohio 43215
614.365.5012
https://www.ccsoh.us/domain/4177

**Homeless Liaison**
**Kevin Boehm**
Central Enrollment Center
430 Cleveland Avenue
Columbus, Ohio 43215
614.365.5140 (phone)
https://www.ccsoh.us/domain/4177

## DULQAAD LA'AAN

Sida uu dhigayo sharciga Ohio, Guddiga Waxbarashadu waxay qaateen siyaasad ah "in aan loo dulqaadan karin" rabshadaha, qaska ama hab-dhaqanka aan habboonayn, oo ay ku jiraan haysashada hubka, waxayna dejiyeen xeelado u dhexeeya laga soo bilaabo ka-hortagga ilaa faragelinta si wax looga qabto hab-dhaqanka.

Marka falalka anshax-marinta la dammaanad qaado, **Dugsiyada Magaalada Columbus waxay ku dadaali doonaan inay joogteeyaan hab wax ku ool ah oo xoogga saaraya isbeddellada wanaagsan** ee hab-dhaqanka oo yareeya carqalad kasta oo ku timaada habka waxbarashada.

Da'da iyo heerka qaan-gaarnimada waxay u baahan yihiin noocyo kala duwan oo ficillo edbin ah. Arrimahan waxa la tixgalin doona marka ay lagama maarmaan noqoto tallaabooyinka sixidda.

Intaa waxaa dheer, anshaxa waa in lagu ilaaliyo habab aan ahayn ciqaab keliya. Ciqaabta jirka lama adeegsan karo.

## KA-HOR-TAGGA XAD-GUDUBKA

Guddigu wuxuu si adag u dhaqan gelin doonaa mamnuucistiisa ka dhanka ah xad-gudubyada takoorka ah ee ku salaysan qowmiyadda, jinsiga, nooca galmada, diinta, midabka, asalka qoomiyadda, da'da, aqoonsiga jinsiga ama hadalka, abtirsiinta, heerka qoyska, heerka milatariga, naafanimada, xogta hidda-raaca, ama wax kasta oo kale oo sharci ah oo Qayb ka ah in la ilaaliyo ("Fasallada La ilaaliyo") barnaamijyadeeda waxbarasho, wax-qabadyada, daawaynta dadka iyo hawlaha shaqaalaynta kuwaas oo ay ilaalinayaan sharciyada federaalka, gobolka, ama kuwa maxaliga ah ee xuquuqaha madaniga ah (Markaas ka dibna waxaa loogu yeeraa Xad-gudubyo Sharci-darro ah).

Macallin kasta, maamule, kormeere, ama shaqaale kale ama mas'uul kale oo degmada ka tirsan oo hela cabasho ku saabsan xad-gudub sharci-darro ah waa inuu u gudbiyaa Sarkaalka u xil-saaran Ka-hortagga xad-gudubyada degmada laba (2) maalmood gudahooda.

### Habka Baaritaanka iyo Dacwada/Cabashada

Dareenka ku xeeran cabashooyinka xad-gudubyada sharci-darrada ah ama aargoosiga awgeed, khadadka wakhtigu way sahlan-yihiin si loo bilaabo habka cabashada; si kastaba ha ahaatee, shakhsiyaadku waa inay sameeyaan dadaal kasta oo ay ku xareeyaan cabashada soddon (30) maalmood gudahood maalmaha kalandarka ka dib marka hawshu dhaco iyada oo xaqiiqda la ogg-yahay oo markhaatiyo suurtagal ah la heli karo. Marka habka cabashada rasmiga ah la bilaabo, baaristu waxa lagu dhamayn doonaa wakhti ku haboon (sida caadiga ah, shan iyo toban (15) maalmood oo ah maalmaha shaqada lagu guda jiro marka cabashada la helo). Dhammaan cabashooyinka xad-gudubyada ee ku lug leh shaqaalaha degmada ama xubin kasta oo kale oo qaangaar ah oo ka tirsan bulshada degmada Dugsiga oo ka dhanka ah arday ayaa si rasmi ah loo baari doonaa. Sidoo kale, eedaymo kasta oo xad-gudub galmo ah ayaa si rasmi ah loo baari doonaa.

## Habka Cabashada aan Rasmiga ahayn

Ardayda aaminsan in si sharci darro ah loogu xad-gudbay waxay cabashadooda ku bilaabi karaan habkan cabashada aan rasmiga ahayn, laakiin loogama baahna inay sidaas sameeyaan. Habka aan rasmiga ahayn ayaa la heli karaa oo keliya xaaladaha ay dhinacyadu (eedaymaha xad-gudubka iyo ku eedaysanaha xad-gudubyada) ay ku heshiiyaan inay ka qayb-qaataan nidaamka aan rasmiga ahayn.

Ardayga aaminsan in si sharci darro ah loou xad-gudbay wuxuu samayn karaa cabasho aan rasmi ahayn, odhaah hadal ah ama qoraal ha ahaadee: (1) macalinka, shaqaalaha kale, ama maamulaha dhismaha dugsiga uu ardaygu dhigto; (2) Kormeeraha guud ama shaqaale kale oo heer degmo ah; iyo/ama (3) si toos ah sarkaalka u qaabilsanaha ah. Dhammaan cabashooyinka aan rasmiga ahayn waa in lagu wargeliyaa Sarkaalka u qaabilsanaha ah kaas oo fududayn doona xallin aan rasmi ahayn sida hoos lagu sharraxay keligiis/keligeed, ama magacaabi doona shakhsi kale si uu u fududeeyo xallinta aan rasmiga ahayn.

Tallaabada ugu horreysa, haddii ardaygu dareemo in iyada/isaga si sharci darro ah loogu xad-gudbay oo iyadu/isagu uu awoodo oo uu dareemo inuu ammaan sidaas sameeyo, shaqsigu waa inuu u sheegaa ama si kale u ogeysiiyaa in xad-gudubka hab-dhaqanku yahay mid aan la jeclayn oo ay tahay inuu joojiyo. Sarkaalka U Qaabilasanaha wuxuu diyaar u yahay inuu taageero oo la taliyo shakhsiyaadka marka uu qaadayo tallaabadan hore ama inuu soo farageliyo isagoo ku hadlaya magaca shakhsiga haddii la codsado inuu sidaas sameeyo. Intaa waxaa dheer, marka la eego noocyada xad-gudubka sharci-darrada ah qaarkood, sida xad-gudubka galmada, Sarkaalka u Qaabilasanaatu wuxuu kugula talin karaa adeegiga habka cabashada aan rasmiga ahayn.

Habka cabashada aan rasmiga ahayn ee Degmada Dugsiga waxaa loogu talagalay in lagu siiyo ardayda aaminsan in si sharci-darro ah loogu xad-gudbay si loo siiyo fursado badan oo loogu talagalay in lagu xalliyo cabashooyinkooda. Iyada oo ku xiran nooca cabashada iyo rabitaanka ardayga sheeganaya xad-gudub sharci darrada ah, xallinta aan rasmiga ahayn waxaa laga yaabaa inay ku lug yeelato, laakiin aan ku koobayn, mid ama in ka badan oo ka mid ah kuwan soo socda:

A. La-talinta ardayga si loola socodsiiyo dabeecadda aan la jeclayn ee hab-dhaqanka qofka lagu eedeeyay xad-gudubka.
B. Qaybinta nuqul ka mid ah siyaasadda ka-hortagga xad-gudubka si ay xasuusin ugu noqoto shakhsiyaadka ku jira dhismaha dugsiga ama xafiiska uu ka shaqeeyo ama uu yimaado shakhsiga hab-dhaqankiisa la waydiinayo.
C. Haddii labada dhinacba ay ku heshiiyaan, Sarkaalka Hoggaaminta ayaa qabanqaabin kara oo fududayn kara kulanka u dhexeeya ardayga sheeganaya xad-gudubka iyo shakhsiga lagu eedeeyay xad-gudubaha si loo helo xal wadajir ah. Kulanka noocaan ah kuma habboona xaaladaha ku lug leh xad-gudubka galmada.

Iyada oo aysan jirin waqti go'an oo ay tahay in lagu xalliyo cabashada aan rasmiga ahayn, Sarkaalka Hoggaaminta ama qofka loo igmaday ayaa adeegsan doona awooddiisa si uu isugu dayo in uu ku xalliyo dhammaan cabashooyinka aan rasmiga ahayn shan iyo toban (15) maalmood oo ah inta lagu guda jiro maalmaha shaqada marka la helo cabashada aan rasmiga ahayn.

## KA-HORTAGGA XAD-GUDUBKA (sii soco)

# Habka Cabashada Rasmiga ah

Haddii cabashada lagu xalin waayo habka cabashada aan rasmiga ahayn, haddii mid ka mid ah labada dhinac uu codsaday in habka cabashada aan rasmiga ahayn la joojiyo si loogu gudbo nidaamka cabashada rasmiga ah, ama haddii ardaygu doorto inuu xareeyo dacwad rasmi ah marka hore, habka cabashada rasmiga ah waa la haqan-gelin doonaa.

Ardayga aaminsan in iyada/isaga lagu sameeyay anshax xun/xad-gudub/aargoosi, ka dib waa in loo tixraacayo "Cabashada", waxa laga yaabaa in ay dacwad rasmi ah, odhaah hadal ama qoraal ah u xareeyaan macalinka, maamulaha, ama shaqaalaha kale ee degmada dugsiga ardayga, Sarkaalka uqaabilsan, Kormeeraha guud, ama shaqaale kale oo Degmo oo ka shaqeeya dugsi kale ama heer degmo. Haddii dacwooduhu uu u sheego macalinka, maamulaha, ama shaqaalaha kale ee degmada dugsiga ardayga, Kormeeraha guud, ama shaqaalaha kale ee degmada, hadal ahaan ama qoraal ahaan, waxa ku saabsan cabasho kasta oo xad-gudubka ah, shaqaaluhu waa inuu ku wargeliyaa macluumaadkaas Sarkaalka Uqaabilsanaanta ama wakiilka laba (2) maalmood oo ah maalmaha shaqada.

Dhammaan cabashooyinka rasmiga ah waa in ay ku jiraan macluumaadkan soo socda ilaa inta la heli karo: aqoonsiga qofka la rumaysan yahay in uu ku hawlanaa, ama ku hawlan yahay, dhaqan xumo/xad-gudub/aargoosi; sharaxaad faahfaahsan oo ku saabsan xaqiiqooyinka ay cabashadu ku salaysan tahay; liiska markhaatiyaasha iman kara; iyo xallinta uu codsaday dhibanuhu.

Isla mar ahaantaana, sarkaalka u qaabilsan wuxuu ku wargelin doonaa shakhsiga lagu eedeeyay inuu ku lug yeeshay xad-gudubka ama dhaqanka aargoosiga, hadda ka dibna loogu yeero "jawaab-celiyaha-eedaysanaha", in cabashada la helay. jawaab-celiyaha-eedaysanaha waxaa lagu wargelin doonaa nooca eedeymaha waxaana la siin doonaa nuqul ka mid ah habraacyada maamul ee khuseeya, oo ay ku jiraan siyaasadda ka-hortagga xad-gudubka ee Guddiga. Eedaysanaha sidoo kale waa in lagu wargeliyaa fursadd uu ku soo gudbiyo jawaab qoraal ah cabashada shan (5) maalmood oo ah maalmaha shaqada gudahood.

In kasta oo kiisaska qaarkood ay u baahan karaan wakhti dheeraad ah, Sarkaalka u qaabilsan ama qofka loo xilsaaray ayaa isku dayi doona in uu ku dhamaystiro baaritaanka eedaha xad-gudubka/aargoosiga shan iyo toban (15) maalmood oo ah maalmaha shaqada gudahooda marka la helo cabashada rasmiga ah. Dhammaadka baarista, sarkaalka u qaabilsanaanta ama qofka loo xilsaaray waa in uu diyaariyo oo gaarsiiyaa warbixin qoraal ah Kormeeraha guud oo soo koobaya baaritaanka, oo uu bixiyaa talooyin ku salaysan caddaynta iyo qeexida xad-gudubka sharci-darrada ah sida ku cad siyaasadda Guddiga iyo Gobolka iyo Federaalka sharciga haddii dhibanaha loo geystay xad-gudub sharci darro ah. Nuqul ka mid ah go'aanka kama dambaysta ah ayaa loo geyn doonaa eedaysanaha iyodhibanaha labadaba.

***Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan Siyaasadda Guddiga 5517 ayaa laga heli karaa bogga degmada.***







## CINWAANKA IX-9-AAD IYO TAKOORKA GALMADA

Dugsiyada Magaalada Columbus kuma sameeyaan takoor ku salaysan jinsiga. Iskuduwaha Ciwaanka IX ee Degmada ayaa diyaar u ah inuu ka jawaabo su'aalo kasta, walaac ama cabashooyin ku saabsan Ciwaanka IX, kaas oo mamnuucaya takoorka jinsiga ee barnaamijyada iyo hawlaha waxbarashada. Ciwaanka IX waxa kale oo uu mamnuucayaa aargudasho ka dhan ah shaqsiyaadka soo gudbiya dacwooyinka ku eedaynaya jebinta Ciwaanka IX, ee ka qayb-qaata baaritaanada Ciwaanka IX, dhegaysiyada, ama dacwadaha, ama u dooda xuquuqda dadka kale ee hoos yimaada Ciwaanka IX-9-aad.

**Ciwaanka IX-9-aa, Takoorka Galmada, iyo Ka-hortagga Xad-gudubka La xiriir:**

Sarkaalka U Qaabilsanaata
614-365-5143
complianceofficer@columbus.k12.oh.us

## XAD-GUDUBKA GALMADA

Dugsiyada Magaalada Columbus uma dulqaadan karaan xad-gudubka ku salaysan jinsiga. Xad-gudubka galmadu waxay ku lug yeelan kartaa hab-dhaqanka qof lab ama dheddig ah oo ka dhan ah qof ay isku lab iyo isku dheddig yihiin.

Iyada oo la raacayo Ciwaanka VII ee Xeerka Xuquuqda Madaniga ee 1964 iyo Ciwaanka IX ee Wax ka Beddelka Waxbarashada 1972, "ku-xad-gudubka galmada" waxaa lagu qeexaa waxaa lagu qeexaa isku-day galmo aan la jeclaysan, codsiyada rabitaanka galmo, iyo dhaqan kale ee afka/hadalka ama taabasho/jirka oo dabeecad galmo ah, marka:

A. Submission to such conduct is made either implicitly or explicitly a term or condition of an individual's status in a class, educational program, or activity.
B. Oggolaanshaha ama diidmada akhlaaqda noocaas ah ee shaqsi ayaa loo adeegsadaa aasaaska go'aannada waxbarasho ee saameeya qofkaas.
C. Dhaqanka noocaas ah wuxuu leeyahay ujeeddo ama saamayn faragelinta wax-qabadka waxbarashada qof-ahaaneed; abuurista jawi barasho oo cabsi gelin, cadaawad ama weerar ah; ama faragelin kartida qofku u leeyahay ka qayb-galka ama ka faa'iidaysiga fasalka ama barnaamij waxbarasho ama wax-qabad.

Falalka mamnuuca ah ee ka kooban faraxumaynta galmada waxay qaadan karaan qaabab kala duwan. Tusaalooyinka noocyada dhaqanka waxay ka koobnaan karaan xad-gudubka galmada waxaana ka mid ah, laakiin aan ku koob-nayn:

- Fikrado galmo aan la soo dhawaynin, casumaado, codsiyo, iyo xod-xodasho/haasaawe.
- Xiriir jireed iyo/ama xiriir galmo aan la soo dhawaynin.
- Hanjabaadaha ama cayda/dhaleecaynta ah in qofka darajadiisa tacliimeed, dallacaadda, shaqada fasalka ama waajibaadyada shaqo, heerka waxbarasho, ka qayb-galka ciyaaraha fudud ama barnaamijyada manhajka ka baxsan ama dhacdooyinka, ama shuruudaha kale ee waxbarashada ayaa laga yaabaa inay si xun u saamayso iyada oo aan la oggolayn in loogu deddelo galmo.
- Waxyaabo galmo soo jeedin ah, sawiro, cajalado muuqaal ah, cajalado maqal ah ama suugaan, oo lagu dhejiyay deegaanka waxbarashada, kuwaas oo laga yaabo inay ceebeeyaan ama meel ka dhac ku sameeyaan shakhsiyaadka.
- Taabasho aan la soo dhawaynaynin oo aan habboonayn, salaaxid, ama qanjaruufo; tilmaamo foolxun.
- Hadallo mala-awaal ah oo ku saabsan hawlaha galmada ee qofka ama taariikhda galmada, ama odhaah ku saabsan hawlaha galmoodka qofka ama taariikhda galmada.
- Duullaanka aan ku habboonayn xudduudaha ee shaqaalaha degmada ama xubin kale oo qaangaar ah oo ka tirsan bulshada Degmada Dugsiga ee goob u gaarka ah iyo nolosha u gaarka ah ee ardayga.

Ma aha dhammaan hab-dhaqanka macnaha galmadu ka kooban tahay faraxumayn sharci-darro ah. Dhaqanka galmada ku salaysan waa in uu ahaado mid aad u daran ama joogto ah oo si xun u saameeya, koobaya, ama u diidaya waxbarashada qofka, ama sida abuurista jawi waxbarasho colaadeed ama xad-gudub, ama mid la doonayo, ama saameyn ku leh. diidmada ama in la xaddido kartida ardaygu uga qayb-qaadan karo ama uga faa'iidaysan karo barnaamijka ama hawlaha waxbarashada.

Dhaqanka galmoodka/xiriirka ardayda uu layeesho shaqaalaha degmada ama xubin kasta oo kale oo qaangaar ah oo ka tirsan bulshada Degmada Dugsiga **waa mamnuuc**, iyo macalin kasta, maamulaha, macalinka ah tababaraha, ama maamulka kale ee dugsi ee ku kaca anshax galmo arday ayaa sidoo kale laga yaabaa in lagu soo oogo dembi. kharashka "batteriga galmada" sida ku cad R.C. 2907.03.



# CAGA-JUG-LAYNTA, XAD-GUDUBKAQ, IYO CABSI-GELINTA

Caga-juglanta, xad-gudubka, iyo/ama cabsi-gelinta ku wajahan ardayga, haday tahay ardayda kale, shaqaalaha, ama cid saddexaad waa mamnuuc loomana dulqaadan doono. Dhammaan cabashooyinka ku saabsan caga-juglaynta ee laga yaabo inay jabiso siyaasaddan waa in si deg-degg ah loo baaro. Mamnuucidan waxaa ka mid ah hab-dhaqanka/dabeecadda gardarada ah; xad-gudub jireed, af, iyo maskaxeed; iyo gacan ka hadal ka dhex dhaca xiriirka xod-xodashada/shukaansiga.

Ujeedooyinka siyaasaddan, caga-juglaynta, xad-gudubka iyo/ama cabsigelinta (wadajir, " caga-jugleyn") waxaa loola jeedaa:

A. Fal kasta oo ula kac ah oo qoraal, hadal ah, elegtaroonig ah, ama jir ah oo arday ama koox arday ah ay u soo bandhigaan arday kale oo gaar ah wax ka badan hal mar iyo hab-dhaqanka, labaduba waxay ugaystaan dhaawac maskaxeed ama jireed ardayga kale waana mid aad u daran, si joogto ah, ama baahsan waxayna u abuurtaa cabsi gelin, hanjabaad, ama deegaan waxbarasho oo dulmi ku ah ardayga kale. Tan waxa ku jira nuxurka ku salaysan qowmiyadda dhabta ah ama la dareemay ee ardayga, jinsiga, nooca galmoodka, diinta, midabka, asal qowmiyadeed, da'da, aqoonsiga jinsiga ama hadalka, abtirsiinyada, heerka qoyska, heerka milatariga, naafanimada, macluumaadka hiddaha, ama xiriirka qof ama koox leh hal ama in ka badan oo ka mid ah sifooyinka kor ku xusan ha ahaato mid dhab ah ama la dareemayo; ama
B. Rabshadaha ka dhex dhaca xiriirka shukaansiga; ama
C. Hab-dhaqanka gardarrada ah, kaas oo lagu qeexay dhaqan aan haboonayn oo soo noqnoqda in ku filan, ama leh halis ku ah, si xun u saameeya wanaaga waxbarashada, jireed, ama dareenka ardayga. Waxaa ka mid noqon kara, laakiin aan ku koobnayn, hab-dhaqamada sida daba-galka, caga-juglaynta, weeraridda xagga interneed-ka, cabsi-gelinta, halis gelinta, qasbidda, magac-ugu yeerista, cayda, hanjabaad-u-jeedinta, iyo hagar-daamaynta; ama
D. Weeraridda xagga internetka iyada oo loo marayo falalka elektaroonigga ah ee la isugu gudbiyo ee ka dhaca dhanka hantida dugsiga.



## Cabashooyinka

Arday kasta ama ardayga waalidkiis/masuulkiisa kaas oo rumay in iyada/asaga uu ahaa ama uu yahay dhibbanaha caga-juglaynta waa in ay isla markiiba u sheegaan xaaladaas Maamulaha Dugsiga ama Kormeeraha Guud. Ardayga waxaa kale oo laga yaabaa inuu u sheego walaacyada macalimiinta iyo shaqaalaha kale ee dugsiga kuwaas oo masuul ka noqon doona ogeysiinta maamulaha ku habboon. Dacwooyinka ka dhanka ah Maamulaha Dhismaha waa in loo gudbiyo Kormeeraha Guud. Dacwooyinka ka dhanka ah Kormeeraha guud waa in loo gudbiyo Guddoomiyaha Guddiga.

Warbixinnada caga-juglaynta waa inay ahaadaan kuwo si macquul ah u gaar ah, oo ay ku jiraan qoka (dadka) ku lugta leh, tirada waqtiyada iyo meelaha lagu eedeeyay falka, bartilmaameedka caga-juglaynta looga shakisan yahay, iyo magacyada arday ama markhaati shaqaale kasta oo imaan kara. Warbixinnada noocan oo kale ah waxaa laga yaabaa in loo gudbiyo xubin kasta oo ka tirsan shaqaalaha dugsiga ama maamulka, warbixinaada waa in isla markiiba loo gudbiyaa Maamulaha Dugsiga si uu u eego, u baaro, oo uu tallaabo u qaado.

Ardayda, waalidiinta/masuuliyiinta, iyo shaqaalaha dugsigu waxay sidoo kale samayn karaan cabasho aan rasmi ahayn ama qarsoodi ah ee caga-jugleyn ah iyaga oo warbixin afka ah u gudbinaya macalinka, maamulka dugsiga, ama shaqaalaha kale ee dugsiga. Cabashada noocaan ah waa inay ku jiraan macluumaadka gaarka ah ee kor lagu sheegay. Xubinka ka mid ah shaqaalaha dugsiga ee hela cabasho aan rasmi ahayn ama qarsoodi ah waa in ay si deg-degg ah u diiwaan-geliyaan cabashada oo qoraal ah, oo ay ku jiraan macluumaadka la bixiyay. Warbixintan qoran waa in si deg-degg ah loogu gudbiyaa xubinta shaqaalaha dugsigu Maamulka Dhismaha si uu u eego, u baaro, iyo talaabada ku haboon uga qaado. Shakhsiyaadka sameeya cabashooyinka aan rasmiga ahayn sida kor lagu sheegay waxay codsan karaan in magacooda uu u-ilaaliyo si qarsoodi ah xubinka shaqaalaha dugsiga iyo maamulaha ee helay cabashada.

Maamulaha Dhismuhu waa in uu diyaariyaa warbixin qoraal ah oo ku saabsan baaritaanka marka uu dhammeeyo. Warbixintan oo kale waa in ay ku jirtaa natiijada dhabta ah, go'aaminta in falalka caga-juglaynta la xaqiijiyay, iyo, marka falalka mamnuuca ah la xaqiijiyo, talo soo jeedinta faragelinta, oo ay ku jirto tallaabo anshaxeed/edbineed waa in lagu soo daro warbixinta. Haddii ay ku habboon tahay, bayaannada markhaatiga oo qoran waa in lagu lifaaqaa warbixinta.

Qofka cabashada qaba waa in lagu wargeliyaa natiijada baaritaanka, iyo sida ku habboon, in tallaabo sixitaan ah la qaaday. Haddii baaritaanka kadib, la xaqiijiyo falalka caga-juglaynta ka dhanka ah arday gaar ah, Maamulaha Dugsiga waa in uu ogeysiiyaa waalidka/masuulka dhibanaha iyo dembiilaha natiijadaas. Haddii cawaaqib edbin ah lagu soo rogo dembiilaha, sharraxaadda anshaxa/edbinta noocaas ah waa in lagu daraa ogeysiiska loo diro waalidka/masuulka dembiilaha.

***Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan Siyaasadda Guddiga 5517.01 waxaa laga heli karaa mareegaha/websaydka degmada.***

## Kaararka Guusha Ardaga

Iyaga oo xoogga saaraya bad-qabka iyo tacliinta, Dugsiyada Magaalada Columbus waxay siin doonaan Kaararka Guusha Ardayga CCS ee dhammaan ardayda PreK-ilaa12-aad laga bilaabo sannad-dugsiyeedkan.

Kaararkani waa aqoonsiyo (ID) shaqsiyeed, oo wata sawir, magac, lambarka ardayga, iyo xaafadda dugsiga ee guriga. Inta lagu jiro sannad-dugsiyeedka, kaararka waxaa loo adeegsan doonaa aqoonsi ahaan inta lagu guda jiro maalinta dugsiga, si fudud ayaa loogu heli karaa barashada khadka tooska ah, laga qaadan karaa buugaagta Maktabadaha Magaalada Columbus, iyo u adeegida marinka habka iibka ee quraacda iyo qadada dugsiga.

Ardayda la siiyo KAARKA GUUSHA CCS waxaa looga baahan yahay inay haystaan aqoonsiga la arki karo maalinta dugsiga oo dhan. Kaararku waxay wataan ilasyo (lanyards) bad-qaba oo ardaydu u xiran karaan aqoonsiga (ID) maalinta dugsiga oo dhan. Xirasho la'aanta aqoonsiga (ID) waxaa loo qaadan karaa xad gudub ah xeerka labiska ardayga.

Ardayda la siiyo KAARKA GUUSHA CCS waxaa looga baahan yahay inay haystaan aqoonsiga la arki karo maalinta dugsiga oo dhan. Kaararku waxay wataan ilasyo (lanyards) bad-qaba oo ardaydu u xiran karaan aqoonsiga (ID) maalinta dugsiga oo dhan. Xirasho la'aanta aqoonsiga (ID) waxaa loo qaadan karaa xad gudub ah xeerka labiska ardayga.

Ardayda fasallada 9-aad-ilaa12-aad oo kaliya waxay sidoo kale u adeegsan karaan Kaarka guusha baska COTA, oo loogu talagalay gaadiid dheeraad ah oo bilaash ah oo lagu tago dugsiga, dhacdooyinka, shaqada, iyo xitaa maktabadda!

## Jawaabta Deg-degga ah/Maareynta Dhibaatada

Dugsiyada Magaalada Columbus waxay ku dadaalaan inay ardayda siiyaan deegaan bad-qaba iyo amni leh iyo inay ilaaliyaan ilmahaaga haddii ay dhibaato/xaalad deg-degg ah dhacdo.

Qorshe bad-qab/maaraynta dhibaato ee degmada oo dhan ah ayaa la sameeyay oo la siiyay shaqaalaha dugsiga si ay u caawiyaan ugana jawaabaan xaaladaha kala duwan ee dhibaatooyinka/xaaladaha deg-degga ah.

Macluumaadka deg-degga ah ee degmada iyo/ama dugsiga waxaa lagu soo dhejin doonaa mareegaha/websaydyada degmada ***www.ccsoh.us*** iyo iyada oo loo sii marayo baraha bulshada ee degmada iyo Mobile Ab-ka, iyo sidoo kale raadiyaha ama xarumaha muuqaal baahiyaha/telefishinka.


Fadlan si toos ah ha u soo wicin dugsiga. Wicida dugsiga waxa laga yaabaa inay hakiso helitaanka khadadka teleefoonada ee loo baahan yahay si loo galo adeegyada gurmadka deg-degga ah.

## XEERKA DUGSIGA XORTA KA AH HUBKA (GFSA)

Guddiga Waxbarashada Columbus waxay u hoggaansamaan **Xeerka-Dugsiga Xorta ka ah Hubka (GFSA)** iyo sharciga gobolka ee u baahan in degmooyinka waxbarashada deegaanka laga eryo dugsiga, muddo aan ka yarayn hal sano (laga bilaabo taariikhda xad-gudubka), ardayga la go'aamiyay inuu keeno hub dugsiga, hanti kale ama hawlo kale oo hoos yimaada awoodda gudsiga, ama haysashada hub uu markii hore qof kale u keenay hantida hoos yimaada awoodda dugsiga.

Intaa waxaa dheer, sharciga gobolka iyo Siyaasadda Guddiga Waxbarashada Columbus ee 5610 ayaa dhigaya in Kormeeraha guud uu ardayga ka eryi karo dugsiga muddo aan ka badnayn hal sano, sababtoo ah Keenista mindi dugsiga, hanti kale ama hawlo kale oo hoos yimaada xukunkeeda, ama haysashada mindi. Kaas oo markii hore qof kale la soo geliy hantida hoos timaada dugsiga, ama bambaan ku hanjabay dhisme dugsi ama dhismo kasta oo hawl dugsi ka dhacayso.

Waalidiintu waa inay ku adkeeyaan caruurtooda sida ay u daran tahay haysashada hub ama mindi, ama ku samaynta bambaano ku handadaada dhulka dugsiga, hantida kale ama wax-qabadyada hoos yimaada maamulka degmada.





## QIIMEYNTA CAAFIMADKA

Iyada oo la raacayo sharciga gobolka iyo siyaasadda guddiga, iyo danta fayo-qabka ardayda, kalkaaliyayaasha dugsiga ee dugsiyada magaalada Columbus waxaa looga baahan yahay inay sameeyaan qiimeyn caafimaad. Haddii aadan rabin in ilmahaaga la qiimeeyo, fadlan la xiriir kalkaalisada dugsiga.

## XASAASIYADAKA//XAJIINTA CUNTADA

Guddiga waxbarashadu waxa ay aqoonsan yihiin in xasaasiyada cuntada mararka qaarkood laga yaabo in ay tahay mid aad daran oo xataa nafta halis/khaytar gelisa. Sida uu farayo Qaybta 3313.719 ee Xeerka Ohio ee dib loo eegay, siyaasaddan waxaa loogu talagalay in lagu abuuro qaab-dhismeed loogu talagalay ardayda qaba xasaasiyadda cuntada iyo in la yareeyo suurta-galnimada fal-celinta xasaasiyadda ee ardayda xasaasiyadda cuntada ee la yaqaan inta ay dugsiga joogaan.


## Waalidka/Masuuliyiinta iyo Waajibaadka Ardayga

Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta ardayda qaba xasaasiyadaha, ama ardayda qaba xasaasiyadaha da'doodu tahay siddeed iyo toban ama ka weyn, waa inay:

A. Ogeysiiyaan maamulaha dugsiga ama kalkaalisada marka ay ogaadaan in ilmahoodu qabo xasaasiyadda cuntada bilawga sanad dugsiyeed kasta ka dib. ixiyaha daryeelka caafimaadku waxaana inuu diiwaan-geliyaa xasaasiyadda iyo amarka wax ka beddelka cuntada sida loo baahdo;
B. Siisaa degmada dawooyinka deg-degga ah ee loo qoray; iyo/ama
C. Fulinta foomka oggolaanshaha daawada, iyo/ama oggolaanshaha qaadashada iyo is-maamulidda durriinka tooska ah ee daawada epinephrine auto-injector (epi-pen), iyo sidoo kale diyaarinta dukumiintiga soo socda, sida ugu habboon:
I. Qorshe hawleedka xasaasiyadda/xajiinta cuntada
II. Qorshe hawleedka xasaasiyadda deg-degga ah ee anaphylaxis
III. Amarka Nidaamka Waxka Bedelka Cuntada

Waalidka iyo dadka ardayda masuulka ka ah ayaa mas'uul ka noqon doona inay ardaydooda ka wacyi-geliyaan maareynta xasaasiyadda ee dugsiga. Maareynta Xasaasiyadda iyo waxbarashada waxaa ka mid ah, iyada oo aan koob-nayn, aqoonsiga "cuntooyinka bad-qabka leh" iyada oo si wadajir ah dib loogu eegayo cuntooyinka quraacda iyo qadada, iyo ka doodista feejignaanta looga baahan yahay in lala wada socdo wax-soo saarka cuntada laga helayo hawlaha dugsi kale iyo mashiinnada wax laga iibsado ee dugsiga.

## DEEGAAN TUBAAKADA/ Si loo ilaaliyo caafimaadka ardayda iyo shaqaalaha, iyo si waafaqsan sharciga gobolka iyo xeerka magaalada Columbus, cabidda sigaarka (oo ay ku jiraan adeegsiga sigaarka elektarooniga ah) iyo adeegsiga wax-soo









## IMAANSHAHA-MAALIN WALBA WAA LA XISAABIYAA!

Maqnaanshaha joogtada ah, waxaa lagu qeexaa inuu maqan yahay 10% ama in ka badan saacadaha dugsiga sabab kasta maqnaanshahu ha noqotee. Tan waxaa ku jira mid leh cudurdaar, mid cudurdaar la'aan ah, cayrin, daahitaan iyo bixitaanno hore. Waxaa xusid mudan, maqnaanshiyaha joogtada ah wuxuu u horseedi karaa ardayda da'da yar inay la halgamaan/la dhibaatoodaan barashada akhriska ilaa fasalka saddexaad, hoos u dhaca ku yimaada guusha dugsiga dhexe iyo inay ku adkaato qalin-jabinta dugsiga sare. Dhammaan kuwaasi waa mudnaanta CCS.

Tan ka sii muhiimsan, Tani waxay ka dhigan tahay kaliya maqnaanshaha LABA MAALMOOD OO KALIYA BISHII - cudurdaar ama cudurdaar la'aan - waxaa lagu dari doontaa in ardaygu si joogto ah u maqan yahay.

Dugsiyada waxaa looga baahan yahay inay ilaaliyaan diiwaanka maqnaanshaha cudur-daarka iyo cudurdaarka la'aanta ee arday kasta. Waalidiinta iyo dadka ardayga masuulka ka ah waa inay wacaan dugsiga si ay uga warbixiyaan maqnaanshaha ardayga ka hor 9:30 subaxnimo maalin kasta uu ardaygu maqan yahay.

Waalidka ama qofka ilmaha masuulka ka ah waa in uu dugsiga u keenaa cudurdaar af ama qoraal ah hal toddobaad gudaheed marka ardaygu soo laabto. Cudurdaar kasta oo af ama qoraal ah oo la bixiyo wakhtigan ka dib lama oggolaan doono ilaa uu qoraal ku ogolaado maamulaha. Haddii aan la helin cudur daar sax ah, maqnaanshaha waxaa loo tixgalinayaa cudurdaar la'aan, taas oo keeni karta in loo gudbiyo maxkamadda da'yarta oo ah dayacaad waxbarasho ama goyso joog-ta ah.

Degmadu waxay xaq u leedahay inay codsato macluumaad dheeraad ah si ay uga cudur daarato maqnaansho kasta. Waa muhiim in ardaydu ka hubiyaan Xafiiska Xaadirka markay yimaadaan. Ardayda aan soo xaadirin waxa laga yaabaa in lagu calaamadiyo maqnaansho cudurdaar la'aan ah maalintaas.

Arday kasta oo laga saaro waa in dib loo diiwaan geliyo Diiwaangelinta Dhexe. Si kastaba ha ahaatee, haddii arday looga saaro cayrinta awgeed, ardaygaas (iyo waalidka) waa in ay ka warbixiyaan xafiiska dugsigii u dambeeyay ee uu dhigan jiray (haddii aan la ogeysiin beddelka dugsiga) oo ay keenaan caddaynta degenaanshaha.

Sida uu dhigayo Xeerka Gudiga 5200, Cudur daarrada soo socda waa in la oggolaadaa maqnaanshaha ardayga:

a. Jirrada shakhsi ahaaneed (Bayaan qoraal ah oo dhakhtar xaqiijinayo jirrada ayaa loo baahan karaa)
b. Ballanta bixiyey daryeele caafimaad
c. Jirrada qoyska ka jirta oo lagamamaarmaan u ah joogitaanka ilmaha
d. Karantiilka guriga
e. Geerida qoyska
f. Xaflad ama dabaaldega ciida diimeed
g. Socdaal ka baxsan gobolka (ilaa ugu badnaan afar iyo labaatan (24) saacadood sannad-dugsiyeedkii oo dugsiga ardaygu u furan yahay waxbarista) si uu uga qayb qaadato kobcinta ama hawlaha manhajka ka baxsan ee degmadu ansixisay (aana la kafaala qaadin) tayeynta ama hawl ka baxsan manhajka
h. Sababta wanaagsan oo noocaas ah oo laga yaabo in uu oggolaado Kormeeraha Guud
i. Fasaxa caafimaad ahaan lagama oo maarmaan u ah haweenka uurka leh sida uu qabo xeerka/siyaasadda 5751
j. Fasaxa caafimaad ahaan oo lagama maarmaan u ah ardayga qaba xaalad caafimaad oo laga diiwan-geliyay taas oo laga yaabo in looga baahan yahay ka maqnaanshaha dugsiga
k. Booqasho kulleejo ama xifad shaqo
l. Maqnaanshaha ay sabab u tahay meelaynta ardayga daryeelka korinta ama isbeddelka meelaynta daryeelka korinta ama dacwad kasta oo maxkamadeed ee la xiriirta xaaladda daryeelkooda korinta
m. Maqnaanshaha ay sabab u tahay ardayga oo hoy-la'aan ah

## Imaanshaha Ardayga iyo Maqnaanshaha sharci la'aanta xad dhaaf ah

Xeerka Ohio ee dib loo eegay ee 3321.191 wuxuu wax ka qabtaa muhiimada imaanshaha dugsiga si caadiga ah iyo saamaynta xun ee maqnaanshaha xad dhaafka ah ay ku yeelan karto guusha waxbarasho ee ardayga. Si loo taageero horumarka waxbarasho ee ardaydeena, degmadu waxay iskaashi la samayn doontaa ardayda iyo qoysaska si loo ogaado loona yareeyo caqabadaha saameeya imaanshaha dugsiga si caadiga ah.

**Caadaysiga gooysmada xad-dhaafka ah waxaa lagu qeexaa sida:**

a. Maqnaanshaha 30 saacadood ama ka badan oo xiriie ah iyada oo aan cudur-daar sharci ah haysan;
b. Maqnaanshaha 42 saacadood ama ka badan hal bil oo dugsiyeedka iyada oo aan cudur-daar sharci ah haysan;
c. Maqnaanshaha 72 saacadood ama ka badan hal sannad-dugsiyeedka iyada oo aan cudur-daar sharci ah haysan;

Waalidka ama qofka ilmaha masuulka ka ah waxaa la ogaysiin doonaa haddii ardaygu leeyahay maqnaansho xad dhaaf ah oo lagu qeexay sida:

d. Maqnaanshaha 38 saacadood ama ka badan hal bil oo dugsiyeedka ah ama iyada oo aan cudur-daar sharci ah haysan; ama
e. Maqnaanshaha 65 saacadood ama ka badan hal sannad-dugsiyeed iyada oo aan cudur-daar sharci ah haysan.

Ardayga ka sarreeya heerarka "caadaysiga maqnaanshaha xad-dhaafka ah iyada oo aan cudur-daar sharci ah haysan" waxaa lagu meelayn doonaa kooxda faragelinta maqnaanshaha halkaas oo xubnaha kooxda ay ku jiri doonaan waalidka/ masuulka iyo shaqaalaha dugsiga loo qoondeeyey. Kooxdu waxay samayn doontaa qorshe ah wax-ka-qabashada si wax looga qabto caqabadaha imaanshaha. Qorshahaan waxaa lala socon doonaa horumarka. Haddii ay dhacdo in horumarka aan lagu samayn muddo 60-maalmood gudahood ah, kooxda faragelinta maqnaanshaha waxaa looga baahan yahay in ay u gudbiyaan dacwad maqnaansho xad-dhaaf ah Maxkamadda Da'yarta ee Degmada Franklin.



# XEERKA LEBBISKA ARDAYGA

1. Dhammaan lebbisku waa inuu ku dhex jiraan xudduudaha asluubta/akhlaaqda/sharafta iyo dhaqanka wanaagsan ee ku habboon dugsiga. Lebbisku waa inuu ku filan yahay in lagu asturo ebbiska hoose mar walba.
   - Labbiska, goonnada, ama surwaallada daba-gaabka ah waa inay ku dhex jiraan xudduudaha asluubta iyo dhadhanka wanaagsan oo aan ka gaabnayn bowdada dhexe.
   - Maya lebbiska hurdada
   - Maya lalool qaawis. Tijaabo ahaan dhererka ku habboon, waa inaan qaarka-dhexe oo qaawan la soo bandhigin marka gacmaha kor loogu qaado madaxa.
   - Lama ogola lebbiska dumarka gac-maha qaawan, dusha garabka ama si kale u muuqda.
   - Lebbiska dumarka laga xirto inta u-dhexeysa xabada ee xuddunta ka sarraysa (Tube tops), Lebbiska dumarka Funaanadaha Garanka, Lebbiska dumarka (halter tops) iyo/ama wax kasta oo ka sarreeya suunka ama lebbis kasta oo muujinaya dhexda ama naasaha lama aqbali karo lamana ogola.
   - Funaanada hoos laga xirto karka kama xiran kartid.
   - Labbiska waa inaan laga "dhex-arkin".
   - Shaararka waa in la xirtaa mar walba waana in qiyaas habboon loo cabbiraa si aanay u faragelin hawlaha dugsiga caadiga ah.
   - Surwaallada daba-gaabka ah, surwaallada, iyo goonooyin waa in aanay wax qoraal ah ku oolin agagaarka kursiga fadhiga.
   - Lebbisyadu waa inaysan ahayn ciriiri ama kuwo aan ku ku habboonayn.
2. Labbis ku habboon ayaa muhiim u ah bad-qabka ardayda. Kabaha waa in la xirto mar walba. Dacaska, Kabaha dabada banaan ee guriga/kabaha qolka jiifka iyo kabaha xeebta lama oggola.
3. Qoraallada ganacsiga ama daabacaadda waa looogolaan doonaa shaararka iyo funaanadaha caadiga ah ilaa iyo inta laga aqbalayo lebbiska dugsiga.
   - Lebbiska iyo jima-jimaha, dhego-dhagaha sil-siladaha waa inay xor ka ahaadaan qoraallada, sawiro ama calaamad kasta oo kale oo cay, xumeyn, nacayb ah, dareen galmo ama u doodis isir nacayb, qowmiyad, lab ama dheddig nacayb xun, ama adeegsiga ama amaanista daroogada, tubaakada, khamriga ama rabshadaha.
   - Kuleetiyada/qoorta biraha ka taag-taagan iyo sil-siladaha ka laad-laada lebbiska lama oggola.
4. Koofiyadaha, koofiyadaha fooda leh iyo noocyada kale ee daboolka madaxa (aan ka ahayn arrimo diimeed/dhaqan) waa inaan lagu gashan dhismaha dugsiga dhexdiisa.
5. Okiyaalaha qorraxda waa loo oggolaaday in lagu xirto dibadda, laakiin looma oggola gudaha dhismaha dugsiga.
6. Ardaydu waxay xiran karaan surwaal daba-gaab ah (Bermuda), surwaalka socodka daba-gaabka ama surwaal kale oo daba-gaab ah iyadoo la raacayo tilmaamaha soo socda:
   - Dhererka surwaalka gaaban waa in uu ahaado mid ku dhex jira xudduudaha sharafta iyo dhadhanka wanaagsan sida ku habboon dugsiga.
   - Lama ogola surwaallada hoos uga dhaca mata-taha/kas-tuumada.
   - Lebbiska daba-gaabka aad u gaaban ama lebbiska jimicsiga gaa-gaaban looma xiran karo wax aan ahayn koorsooyinka waxbarashada jir-dhiska.
7. Surwaalka Buuxa/balafka ah waa inuusan faragelin/car-qaladeyn hawlaha caadiga ah ee dugsiga waana inuu ahaadaa mid wacan oo nadiif ah mar kasta. Dhammaan surwaallada dhaadheer waa in ay ahaadaan cabbirka dhexda ku habboon, dhererka iyo cabbirka lugaha (aan hoos u dhacaynin; lama ogola lebbiska aadka uga weyn).
   - Ardayda xiran dharka guud ee kor laga soo gashado ama labiska kale ee nooca biibka ah waa inay si habboon u xirtaan suumanka/galuusyada oo ay hoos ka xirtaan shaarka la aqbali karo ama hoos laga xirto guntiino la aqbali karo.
   - Dhexda surwaalku waa in aanay ka badan hal inji/xubin oo ayna ka weynayn cabbirka dhexda ardayga ee saxda ah.
   - Surwaalka laguma soo arurin karo, lagumana soo wada jiidi karo dhexda, waana in aanu ka laad-laadin dhexda wixii ka hoosaysa.
   - Toliimada surwaalka waa in loogu cabbiraa si ku habboon ardayga. Dhererka surwaalka waa inuusan taaban ama ku jiid-jiiin dhulka.
   - Suunka waa in aanu ka dheerayn saddex (3) inji in ka badan cabbirka dhexda la qiyaasay ee ardayga.



## CALAAMADAHA GANGIGA/BUDH-CADDA IYO DHARKA GANGIGA LA XIRIIRA

Guddida Waxbarashadu waxa ay doonaysaa in ay dugsiyada degmada iyo ardayda ka ilaaliso hanjabaadaha ama saamaynta waxyeellada leh ee koox kasta ama kooxaha u ololeeya adeegsiga maandooriyaha ama hab-dhaqanka car-qaladaynta. Ujeedada tilmaamahan, "dharka la xiriita kooxaha gaangiska" waxaa lagu qeexaa inay yihiin dhar, haddii la xirto ama lagu soo bandhigo dhulka dugsiga/xaramka, la go'aamin karo inay khatar geliso caafimaadka iyo bad-qabka deegaanka dugsiga.



## Ujeedada Bayaanka

Ujeedada bixinta internet-ka iyo gelitaanka isku xirka dugsiyada waa in la taageero hadafka Degmada: "Arday kastaa waa mid aad wax u bartay, u diyaarsan hoggaaminta iyo adeegga, iyo awoodsiinta guusha muwaadin ahaan bulshada caalamka."

## Shuruudaha Heshiiska

Si ardayda loogu oggolaado inay galaan nidaamka kombayuutarka dugsiga, shabakadda kombuyuutarka, iyo internet-ka, waalidiinta iyo ardaydu waa inay saxiixaan oo soo celiyaan foomka oggolaanshaha.




## Keen Qalabkaaga

Sida uu qabo Xeerka Guddiga, ardayda waa in loo oggolaadaa inay dugsiga keenaan qalabkooda elegtarooniga ah (BYODs) iyadoo la filayo adeegsiga waxbarashada. BYOD-yada la oggolaan karo waxaa ka mid ah laptops, tablets, telefoonada gacanta, kaameerooyinka, iyo MP3/Ciyaartoyda CD-ga (oo leh sameecado).

BYOD-yada aan la oggolaan karin waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn ilayska/laysarka, ciyaaraha elektiroonigga ah iyo boombalayaasha ay carruurtu ku ciyaarto.

Macallimiintu waxay dooran karaan inay oggolaadaan adeegsiga BYOD-yada si ay u kabaan waxbarashadooda fasalka. Si kastaba ha ahaatee, BYOD-yadu waa inay hoos timaadaan mamnuucid ah xagga siyaasadda oo ardaydu maadeegsan karaan BYOD-yada hantida dugsiga ama hawlaha dugsigu maalgeliyo si ay u galaan iyo/ama u daawadaan mareegaha internetka ee si kale looga mamnuucay ardayda dugsiga.

Helitaanka interneetka ee BYODs waa inay ahaataa oo kaliya iyada oo loo marayo dugsiga si sugan/ammaan ah, oo la sifeeyey laguna bixiyo Wi-Fi. Adeegsiga BYOD-yada wixii ka baxsan midka ay ogolaatay siyaasadda Guddiga waa in lagu soo rogo anshax sida hoos timaada Hagaha Guusha Ardayga.

## Sharciyada Adeegsiga Internet-ka/Shabakadda

Degmadu waxay siinaysaa marin u helka nidaamka kombayuutarka dugsiga, shabakadaha kombayuutarka, iyo internet-ka ujeedooyin ah waxbarashada iyo shaqada la xiriita oo kaliya si loo kobciyo xirfadaha fikirka qarniga 21-aad iyo dhiirigelinta dhalashada dhijitaalka ah ee masuulka ka ah. Dugsiyada Magaalada Columbus (CCS) waxay adeegsadaan tillaabooyinka bad-qabka khuseeya gelitaanka internet-ka iyada oo loo marayo kombuyuutarrada Degmada. Tallaabooyinkan bad-qabka ah waxaa ka mid ah adeegsiga barnaamijka sifaynta software-ka kaas oo ka xaddidaya ardayda iyo shaqaalaha degmada inay helaan walxaha waxyeelada u leh carruurta yaryar, sida lagu qeexay 47 C.F.R. 54.520 (a) (4).

Adeegsiga shabakada kombiyuutarka iyo internet-ka waa mudnaan, ee xaq maaha. Helitaanka internet-ka waxaa kormeera degmada. Adeegsiga ku xad-gudba heshiiskan, ugu yaraan, waa in laga joojiyaa marin u helka shabakadda iyo internet-ka waxaana laga qaadi doonaa tallaabo anshax dheeraad ah oo ka timaada dugsiga iyo/ama maamulka degmada.

- Shabakadda CCS looma aasaasin adeegga galitaanka dadweynaha ama gole dadwayne. Degmadu waxay xaq u leedahay in ay xayiraad macquul ah saarto shayga la helay ama lagu dhejiyay nidaamka. Ardayda iyo shaqaalaha waxaa laga filayaa inay raacaan xayiraadaha noocaas ah iyo sharciga adeegsiga shabakadda.
- Ardaydu uma adeegsan karaan shabakada CCS faa'iido maaliyadeed ama ganacsi, ama wax kasta oo sharci darro ah.
- Shabakadda CCS waxaa laga yaabaa in aan loo adeegsan kari ololayn siyaasadeed, dhaq-dhaqaaq siyaasadeed oo xisbi ama hawlo kale oo siyaasadeed oo sharcigu mamnuucay. Ujeedooyinka siyaasaddan, "ololayn-siyaasadeed" kuma jiraan: la xiriirka adeegsadayaasha kale ee shabakadda CCS ee ku saabsan arrimaha la xiriirka hawl-galka degmada, ama (b) u doodista sharci-dejinta ama maamulka magaca CCS ee kuwa ay oggolaadaan Guddida Waxbarashada ama Kormeeraha Guud.
- Shabakadda iyo gelitaanka internet-ka waxa loo bixiyaa sidii qalab waxbarasho. Degmadu waxay xaq u leedahay inay la socoto, kormeerto, koobiyo/nuqullo, dib u eegto oo kaydiso wakhti kasta iyo digniin la'aan hore mid iyo dhammaan adeegsadeyaasha shabakada kombayuutarka iyo marin u helka internetka, iyo dhammaan macluumaadka la isugu gudbiyo ama la helo ee la xiriira adeegsigan. Dhammaan faylalka macluumaadka noocaan ah waa inay ahaadaan hantida degmada, mana jiro adeegsade kale oo leh wax rajo ah oo gaar ah oo ku saabsan alaabtaas.



**Sidaa awgeed, hab-raacyada maamulka ee ka-qaybgalka qof kasta oo ku jira internet-ka iyo shabakadda waa in ay ku jiraan laakiin kuma koobna kuwan soo socda:**

## Bad-qabka Internetka

- Adeegsiga aalad kasta Si loo hareer maro shaandhaynta nuxurka ee degmadu fulisay waa mamnuuc.
- Looma oggola Adeegsadaha isaga oo ogg ama si badheedh ah ugu shubo ama ugu abuuro fayras (virus) kombiyuutarka, ama uu ku shubo software kasta kaas oo baabi'iya faylasha iyo barnaamijyada, jahawareeriya adeegsadayaasha, ama carqaladeeyaan wax-qabadka nidaamka.
- Ma jirto software-ka qolo ah dhinac saddexaad ah oo rakibi doonta iyada oo aan oggolaansho laga helin Habka Qiimaynta Software-ka/Websaytka ee Tilmaamaha.
- Looma oggola Adeegsadaha inuu la wadaago aqoonsiga adeegsadaha ama ereyada sirta ah, ama uu ku dhejiyo meel muuqata.
- Looma oggola Adeegsadaha inuu adeegsado akoonnada qof kale ama furaha sirta ah ama uu siiso aqoonsiga adeegsadaha ama erayga sirta ah qof kale.
- Tallaabooyinka cabbirka ilaalinta farsamada tignoolojiyadda waxaa curyaamin kara oo keliya Maamulka Tignooloojiyadda Macluumaadka (ITM) inta lagu guda jiro adeegsiga kombuyuutarrada dadka waaweyn si loogu oggolaado gelitaanka internet-ka ee cilmi-baarista ama ujeedooyin kale oo sharci ah.
- Looma oggola Adeegsadaha inuu ka qayb-qaato hawlaha jabsiga/xadidda ama nooc kasta oo ah galitaanka aan la ogolayn ee kombiyuutarada kale, shabakadaha, ama nidaamyada xogta.

## xoogg-usheegashada/caga-juglaynta Internet-ka


Caga-juglaynta internet-ka, fal danabaysan/elektaroonig ah oo caga/jugleyn ah, waxaa lagu qeexaa xaalad marka qofka la jir-dilo/sil-ciyo, loo hanjabo, la dhibaateeyo, la bahdilo, la ceebeeyo ama si kale loo bartilmaameedsado iyada oo loo adeegsanayo fariimo qoraal ah, iimaylka, fariimaha deg-degga ah, ama dhajinta qoraal ama sawirro iyada oo la adeegsanayo warbaahinta bulshada ama fal danabaysan/elegtaroonig ah. Xoog u-sheegashada/caga-juglaynta internet-ka, dhibaataynta, ama cabsi gelinta waa mamnuuc. Haddii arday lagu helo inuu ku hawlan yahay caga-juglaynta internet-ka oo si toos ah u saamaysa deegaanka dugsiga, waxa la qaadayaa ardayga tallaabo anshaxeed, oo ay ku jirto dugsi-ka-joojin ama ka cayrinta suurtogalka ah. Haddii qof uu aaminsan yahay in isaga/iyada uu yahay dhibbanaha caga-juglaynta internet-ka, waa muhiim in aan loo jawaabin xoog-usheeggtaha. Taa beddelkeeda, xaaladda waa in loo sheego xubin ka mid ah shaqaalaha, sida macalinka, maamulaha, ama qof kale oo maamulka ah. Intaa waxaa dheer, ardayda waxaa lagu dhiirigelinayaa inay ogeysiiyaan shaqaalaha dugsiga haddii ay ka shakiyaan in arday kale la dhibaateynayo.

## Tilmaanta/Waxbarashada Ardayga

Qaybaha korriinka ku habboon ee bad-qabka internet-ka, caga-juglaynta internet-ka iyo ka hortagga caga-juglaynta ayaa lagu bixiyaa goobta xiriirka qoyska ee loo yaqaan Naviance ee arday kasta ee dugsiyada dhexe iyo sare. Ardayda dugsiga hoose waxay wax ku bartaan dhismayaashooda.

### Aasaaska Internet-ka Anshaxa/Hab-dhaqanka Shabakadda iyo Xeerarka Bad-qabka

- Noqo qof edeb leh oo ixtiraam leh. Adeegso luuqadda ku habboon iyo sawirada/garaaf-yada.
- Ha u adeegsan shabakada ama helitaanka internet-ka si aad u samayso, u qaybiso, ama dib u qaybiso kaftan, sheekooyin, ama waxyaalo kale oo ku salaysan aflagaado ama fikrado khaldan oo la xiriira asalka, jinsi, qowmiyad, da', dhalasho, diin, xagga galmada ama naafanimada.
- Dhammaan ardayda iyo shaqaalaha Degmadu waa inay u hoggaansamaan shuruucda xuquuqda daabacaadda ee Maraykanka (PL 94-553) iyo Xeerarka Koongareeska ee qeexaya arrimaha ku saabsan software-ka, qoraannimada, iyo nuqulka macluumaadka. Ha soo dejin walxaha xuquuqda daabacan Ha soo dejin walxaha xuquuqda daabacan ama softiweer ogolaansho la'aan aan laga helin mulkiilaha.
- Siyaasadaha degmada ee ku saabsan **been-abuurka/khiyaanada iyo dhibaataynta/cabsigelinta** waxay khuseeyaan internet-ka iyo hab-dhaqanka/anshaxa shabakada.
- Ardaydu wax kuma iibin karaan ama wax ka kuma gadi karaan internet-ka.
- Ha gudbin ama ha galin waxyaabaha fisqiga ah, sawiro qaawan ama waxyaabaha kale ee aan habboonayn; Ogeysii macalinkaaga ama maamulahaaga haddii aad hesho agabkaas oo kale.



## SIYAASADDA ADEEGSIGA LA OGOLAAN KARO:
### Aasaaska Internet-ka Anshaxa/Hab-dhaqanka Shabakadda iyo Xeerarka Bad-qabka

- Ha gudbin ama ha galin waxyaabaha fisqiga ah, sawiro qaawan ama waxyaabaha kale ee aan habboonayn; Ogeysii macalinkaaga ama maamulahaaga haddii aad hesho agabkaas oo kale.
- U-adeegsiga internet-ka iyo shabakada fal kasta oo sharci darro ah waa mamnuuc. Hawlaha sharci darrada ah waxaa ka mid ah: (a) ku xad-gudbida qalabka kombiyuutarka, software-ka ama xogta; (b) Galitaanka aan la ogolayn ee kombayutarada iyo faylalka (jabsiga); (c) Waxyeeloogaal/kas ah ama burburinta qalabka; iyo (d) Tirtiridda faylasha kombiyuutarka. Hawsha noocaan ah waxaa loo arkaa dambi marka loo eego sharciga gobolka iyo federaalka. Ha u adeegsan shabakada ama interneet-ka si aad ugu dirto fariimaha la xiriira ama sinaba u taageeraya hawlaha sharci darrada ah sida iibinta ama adeegsiga maandooriyaha ama khamriga; taageeridda fal-dembiyeedka ama burcadda; iyo han-jabaadaha, caga-jugleyn ama dhibaatayn qof kale.

## Shabakadaha Bulshada, Qolalka Wada-sheekeysiga, iyo iimaylka
### Bad-qabka qof-ahaaneed:

- Weligaa ha baafin/ha soo dhajin xogta gaarka ah ee qof-ahaaneed, sida magaca oo buuxa, lambarka balan-qaadka bulshada (SSN), ciwaanka, lambarka taleefoonka, koontada bangiga ama lambarka kaarka deynta (ccn), ama ku shaacin/dhaji macluumaadkan oo kale oo ku saabsan qof kale.
- Ka soo qaad in wax kasta oo lagu shaaciyo/dhejiyo internet-ka ay yihiin kuwo joogto ah oo aan laga saari karin marka la codsado.
- Weligaa ha oggolaan inaad si shaqsi ah ula kulanto qof kugula kulmay barta/shabakada bulshada ama qolka lagu sheekeysto.
- Ku xad-gudubka shuruudaha sharciga gobolka iyo federaalka ee ka hadlaya xuquuqda gaarka ah ee ardayda, oo ay ku jirto siidaynta aan la oggolayn, adeegsiga iyo faafinta xogta qof-ahaaneed waxay keeni kartaa anshax/edbin ilaa iyo oo ay ku jiraan cayrinta ardayda iyo shaqo ka joojinta shaqaalaha.
- Waligaa ha adeegsanin aflagaado, fisqi ama luuqadd kale oo laga yaabo inay meel ka dhac ku tahay adeegsade kale ama loogu talagalay in lagu dhibaateeyo, cabsi geliyo ama loogu xoog-sheegto adeegsadeyaal kale.
- Weligaa ha u adeegsan kombuyuutarrada degmada si aad u gasho shabakadaha/mareegaha isku xirka bulshada oo leh ujeeddooyin/arrimo aan ahayn waxbarasho. Weligaa dib ha ugu faafin/hore ha ugu gudbin/ha ugu faafin xiriirka qof-ahaaneed iyada oon oggolaansho hore laga haysan qoraaga.
- Weligaa ha u dirin ama u gudbin xarfaha taxanaha/silsiladda ama "waraaqaha aan loo baahnayn" ("spam") kooxo badan oo adeegsadayaal ah.
- Kaydinta "faylasha shaqaalaha gaarka ah ee aan la fasixin" oo ay ku jiraan sawirro, kaftan, fiidiyowyo, ciyaaro iyo software kale oo madadaalo ah oo ku saabsan teknooloojiyadda degmada waa mamnuuc.

## Dammaanad qaadka iyo Mas'uuliyadaha

Dugsiyada Magaalada Columbus (CCS) ma dammaanad qaadayaan in hawlaha ama adeegyada ay bixiso ama iyada oo loo marayo shabakadda CCS ay noqon doonaan kuwo aan khaladaad lahayn ama aan cillad lahayn. CCS mas'uul kama noqon doonto wixii dhaawac ah ee soo gaara, oo ay ku jiraan laakiin aan ku koobnayn, luminta xogta ama joojinta adeegga. CCS mas'uul kama aha sax-naanta ama tayada macluumaadka laga helay ama lagu kaydiyay nidaamka. CCS mas'uul kama noqon doonto waajibaadka maaliyadeed ee ka dhasha adeegsiga la oggolaaday ama aan la fasixin ee shabakadda CCS.

## Hanaanka Sharciga/Saxda ah

- CCS waxay si buuxda ula shaqayn doontaa saraakiisha maxalliga ah, gobolka, ama federaalka baaritaan kasta oo la xiriira wax kasta oo sharci darro ah oo lagu sameeyo shabakadda CCS.
- Haddii ay dhacdo sheegasho tilmaamaysa ku xad-gudubka Siyaasadda Adeegsiga La Aqbali karo ee Degmada ayaa ka dhacday adeegsiga shabakadda CCS, ardayga ama shaqaalaha waxaa la siin doonaa fursad lagu maqlo sida ku cad sharciga, siyaasadaha, qawaaniinta, iyo xeerarka.
- Ku xad-gudbi kasta oo ah xeerka guddiga ee ku saabsan adeegsiga tignooloojiyada waxay keeni kartaa anshax marin ilaa iyo oo ay ku jirto cayrinta ardayda.

### Helitaanka Internet-ka

Ilaha kombuyuutarka ayaa la bixiyaa si ay u taageeraan hawlaha waxbarashada iyo hawlaha maamulka.

**Soo deji Ab-ka Dugsiyada Magaalada Columbus**



## XEERARKA EDEBTA/ANSHAXA CARUURNIMADA HORE

Dugsiyada Magaalada Columbus' **Barnaamijka-Barbaarinta ka hor (Pre-Kindergarten Program)** wuxuu adeegsadaa hab loo wada dhan yahay oo wanaagsan oo ku saabsan maareynta fasalka. Macallinka dugsiga barbaarintu wuxuu bilaabaa habka maaraynta fasalka oo wanaagsan maalinta ugu horreysa ee dugsiga isaga oo samaynaya waxyaabaha soo socda:

Ka qayb-galka carruurta marka la samaynayo xeerarkan fudud iyada oo loo marayo **Taageerada Faragelinta Hab-dhaqanka Wanaagsan (PBIS):**

### Noqo mid Ixtiraam leh

- Waanu dhagaysanayna inta ay kuwa kale hadlayaan.

### Be Responsible

- Waxaan nadiifineynaa booskeena markaan dhameyno shaqadeena iyo ciyaarteena.

### Be Safe

- Waxaan u-adeegsanaa codkeena gudaha dhismaha.

Hagaajinta jawiga fasalka jimicsiga jir-ahaaneed si kor loogu qaado yoolka dhammaan ardayda ku hawlan waaya-aragnimada waxbarasho, yaraynta wakhtiga.
Qorshaynta hawlaha ku habboon oo leh dheelitirnaan firfircoon iyo xasillooni, iyo wax-qabadyo uu ilmuhu hoggaamiyo oo ka soo horjeeda macallinka inta lagu jiro maalinta. U muujinta welwel, daryeel, iyo cadaalad ilmo kasta. qaabaynta joogtada ah oo si cad u baridda xeerarka iyo waxa laga filayo.

Management fasalka xanaanada ka hor (Preschool) waxaa loo arkaa inuu hagayo hab-dhaqanka caruurteena. Hadafka kama dambaysta ah ee maaraynta fasalka waa in laga caawiyo carruurta inay noqdaan kuwo madaxbannaan oo ay helaan xirfado is-xakameyn. Meesha anshaxu/edbintu qeexayso cawaaqib xumada aad siiso ardayda raaci wayda sharciyada, maamulka fasalka wuxuu qeexayaa habraacyo guud oo badan, habraacyo, iyo xeelado, kuwaas oo intooda badan looga dan leeyahay in laga hortago caqabadaha halkii laga falcelin lahaa.

Hanuuninta ilmaha ee wax dhisidda, koriinka ku haboon iyo farsamooyinka maaraynta ayaa mar walba la adeegsadaa. Tallaabooyinka waxaa ka mid ah laakiin kuma koobna kuwan soo socda: Xeelado dejinta, dib u hagid, la hadalka ilmaha iyo waalidka, ammaanida afka ah oo gaar ah oo loogu talagalay hab-dhaqannada la filayo iyo samaynta xeerarkan fudud ee fasalka dugsiga barbaarinta.

Carruurta yar ee laga yaabo inay la kulmaan caqabado ku saabsan is-xakamaynta ama dejinta nidaam cusub oo dugsiyeed, shaqaalaha dugsiga barbaarinta ayaa samayn doona qorshe hawleed waalidka(iinta) iyo degmada, ama taageerada bulshada si ay u caawiyaan horumarka ardayga.

**Aadaabta wanaagsan, horumarka leh waxay ku salaysan tahay tilmaamaha soo socda:**

- Ixtiraan ilmo walba qof ahaan.
- U heellanaanta daryeelka iyo caafimaad qab ilmo kasta.
- Avoidance of cruel, harsh, corporal or unusual punishment.
- Ka fogaanshaha naxariis darrada, qallafsan, jirka ama ciqaabta aan caadiga ahayn.
- U hoggaansanaanta meelaha ku habboon ee kala soocida ee ku salaysan da'da iyo awoodda korriinka ilmaha.
- Ka fogaanshaha nooc kasta oo ah ku xad-gudubka iyo dayaca ilmaha.

## HEERARKA IYO XEELADAHA FARAGELINTA HAB-DHAQANKA

Dhammaan ardaydu waxay xaq u leeyihiin inay wax bartaan, mana jiro arday xaq u leh inuu carqaladeeyo hawlaha waxbarasho ee kuwa kale. Bad-qabka  iyo ammaanka ilmahaaga ayaa ah mudnaantayada ugu sareysa waxaana naga go'an inaan bixino deegaan waxbarasho oo bad-qab ah. Waalidka Dugsiyada Magaalada Columbus, ESSA (Sharciga Guusha Arday Kasta) waxa ay odhanaysaa waxaad xaq u leedahay inaad: u heli karaan heerar hawl-qabad qof-ahaaneed ee ilmahooda qiimaynta gobolka oo dhan, oo ay ogaadaan haddii dugsiga ilmahoodu horumar samaynayo sida ku cad kaarka warbixinta gobolka.

Hagaha Guusha Ardayga waxa uu bixiyaa qeexitaanno ku saabsan xad-gudubyada hab-dhaqanka oo qeexaya liiska cawaaqibka ka dhalan kara dhaqan-xumada awgeed. nshax-xumada waxaa lagu qeexaa sida ay u kala horreeyaan sida:

| | |
|---|---|
| **Heerka I -aad** | Dembiyada yar-yar |
| **Heerka II -aad** | Heerka I-aad ee dembiyada soo noqnoqda ama anshax-xumada daran |
| **Heerka III -aad** | Heerka I-aad ama Heerka II-aad ee Dembiyada soo noqnoqda, sharci-darrada ah iyo/ama anshax-xumada daran, ama dembiyada nolosha ama caafimaadka khatar gelinaya |

Shaqaalaha Dugsiyada Magaalada Columbus waxay siiyan Shaqaalaha Dugsiyada Magaalada Columbus waxay bixiyaan heerarka xeeladaha faragelinta lagu saxayo iyo edbinta ardayda ku guul dareysata inay ka soo baxaan waxyaabaha laga filayo hab-dhaqanka. ciqaab jidheed nooc kasta ha ahaatee lama ogola.

Ikhtiyaaro badan oo lagu saxayo hab-dhaqanka ardayga ayaa la dooran karaa iyada oo ku xiran baahida arday gaar ah, oo ay ku jiraan da'da iyo heerka fasalka ardayga, oo ay ku jiraan da'da iyo heerka fasalka ardayga, taariikhda ardayga ee dhaqan xumada, iyo dembiga gaarka ah iyo halistiisa. Shaqaalaha dugsigu waxay adeegsadaan xeelado faragelinta hoos lagu sharraxay si ay u caawiyaan kordhinta dabeecadaha la rabo.

## Xeeladaha Faragelinta CCS

**Xiriirka/Shirka Waalidka** – Ogeysiinta iyo la kulanka waalidka ee ku saabsan anshaxa ardayga dhammaan falalka anshax marinta.

**Xeeladaha Hab-dhaqanka Ku Salaysan Dugsiga** – Tusaalooyinka waxaa ka mid ah:

- Abuuritaanka heshiis hab-dhaqan xiriir ee ardayga
- Bar/Baro xeeladaha maareynta xanaaqa/carada
- Luminta mudnaanta dugsiga ku salaysan
- Dib-u-barista filashooyinka hab-dhaqanka
- U-gudbinta la-taliyaha dugsiga ama shaqaalaha bulshada dugsiga
- U-gudnita Kooxda Caawinta Faragelinta ama bilaw Nidaamyada Taageerada badan ee Tiered-ka badan (MTS.S.)

**Dadaallada wanaagsan ee hagaajinta iyo aqoonta (P.E.A.K.)** waxay ardayda siisaa meel bannaan oo dugsiga dhexdiisa ah si ay u taageeraan oo ay u horumariyaan xalinta-dhibaatooyinka, go'aan samaynta, is-xakamaynta, iyo xirfadaha dabeecadda iyo dareenka dheeraadka ah.

**Qol-ku haynta Dugsiga** – Ardayga waxaa laga yaabaa in looga baahdo inuu joogo dugsiga ka dib ama lagu meeleeyo qol-ku haynta waqtiga qadada natiijada hab-dhaqankiisa/keeda. Qol-ku haynta waxa ku jiri kara casharo ku saabsan maaraynta hab-dhaqanka oo loo abuuray in laga caawiyo ardaygu inuu barto xirfado xalinta mashaakilaadka oo u horseedi doona isaga ama iyada doorashooyin wanaagsan.

**Ka joojinta/ Ka-hakinta Dugsiga/ Dib u habeynta Heerka II (Tier II) (Xarunta Taageerada)** –Dib-ugu-qorista ardayga fasalka laga soo beddelay ee loo soo beddelay goob kale. Ardeyda loo qorsheeyay ka joojinta dugsiga looma oggola wax-qabadyada manhajka ka baxsan ilaa maalinta xigta ee dugsiga ka dib marka ay dhammeeyaan ka joojintooda.

Dib u habeynta/Dib-u-dejinta HeerkaTier II (Tier II) (Xarunta Taageerada), dib-ugu-qorista meelaynta hawlaha shaqo ee laga rabo waa onlaynka kama badnaan doonto shan (5) maalmood oo isku xigta. Ardaydu ma dhigi doonaan in ka badan toban (10) maalmood sannad dugsiyeedka. Ardayda lama meelayn doono in ka badan toban (10) maalmood sannad-dugsiyeedka.

**Ka-hakinta Dugsiga** – Ka saarista ardayga dugsiga muddo hal (1) ilaa toban (10) maalmood ah. Inta lagu jiro cayrinta, ardayda looma ogola inay ka qayb-qaataan wax-qabadyada manhajka ka baxsan, looma ogola inay dhex tagaan/joogaan hanti dugsiyeed ama raacaan basaska/baabuurta kasta ee dugsiyeed. Nidaamyada racfaanka ayaa laga heli karaa dhismo kasta oo dugsi haddii la codsado waxaana lagu daraa ogeysiiska ka joojinta. Shaqada fasalka (Classwork) waa in la bixiyaa marka ay natiijadu ka baxdo ka joojinta dugsiga.

**Eryidda** – Ka saarida ardayga dugsiga muddo ah kow iyo toban (11) ilaa boqol iyo sideetan (180) maalmood. Haddii ay habboon tahay, ardayda waxaa lagu meelayn karaa barnaamij kale oo khadka tooska ah beddelkii cayrinta. Ku meelaynta barnaamijka Beddelka ah ee Heerka III (Tier III) ee khadka tooska ah (onlaynka) ayaa ardayga siisa fursad labaad oo laguma xisaabinayo cayrinta diiwaanka ardayga. Ardaydu waa inay raacaan dhammaan shuruudaha barnaamijka haddii kale shaqada waxay si toos ah ugu noqonaysaa cayrinta. Intaa waxaa dheer, arday kasta oo la eryo looma oggolaan doono inuu ku codsado bakhtiyaa-nasiibka Doorashada Dugsiga si uu ugu noqdo dugsigii laga soo eryay. Codsi kasta oo bakhtiyaa-nasiibka cusub ah lama oggolaan doono haddii ay abuuri doonto khatar ammaan oo la yaqaan.

## Kala hadal ilmahaaga wax ku saabsan dugsiga.

- U muuji xiisaha dugsiga iyo shaqada guriga.
- U samee ilmahaaga yoolal macquul ah, ka dibna mid mid ugu fiirso.
- Sii meel xasiloon oo shaqada-guri lagu dhamayn karo.
- Ka caawi ilmahaaga dhamaystirka shaqada guriga. Xusuusnow, WELIGAA ha samayn shaqada guriga ee ilmahaaga!
- Si joogto ah ula xiriir macalinka ilmahaaga.
- Horumar iyo dadaal dhab ah filo oo ku ammaano.
- U fiirso waxyaabaha uu ilmahaagu ku fiican yahay ee dugsiga.
- Samee xiriirka ka dhexeeya waxa lagu barto dugsiga iyo waxa ilmahaagu horey u yaqaanay.
- La soco daawashada telefishinka ilmahaaga iyo adeegsiga kombiyuutarka.
- Ku dhiiri geli wax-akhrinta iyo ka-qaybgalka hawlaha manhajka ka baxsan.
- Ka caawi ilmahaaga inuu noqdo mid si fiican habaysan: u kala qaybi shaqada qaybo yaryar oo la maarayn karo.
- U diyaari alaabta loo baahan yahay (dharka, shaqada-guri, warqadaha ogolaanshaha, iwm.) habeen ka hor si ay uga fogaadaan deg-degga daqiiqadaha ugu dambeeya subaxdii.

## SU'AALAHA AKADEEMIYADDA KHADKA INTERNETKA COLUMBUS?

Haddii waalidiinta ama ardaydu ay qabaan wax su'aalo ah ku saabsan **AKADEEMIYADDA KHADKA INTERNETKA COLUMBUS**, fadlan booqo:

https://www.ccsoh.us/columbusonlineacademy

ama iimayl ugu dir:

**Columbus Online Academy K8**
ColsOnlineAcad_K8@columbus.k12.oh.us

**Columbus Online Academy 9-12**
ColsOnlineAcad_912@columbus.k12.oh.us

# SOO KOOBIDDA XEELADAHA & NATIIJOOYINKA/CAWAAQIBKA

| | Xeeladaha iyo Natiijooyinka/Cawaaqibka | Xiriirka/Shirka waalidka | Faragelinta Hab-dhaqanka ku salaysan dugsiga | U-diridda Ardayga Barnaamijka Taageerada(qof-ahaaneed) | Waqtiga Haynta: PEAK (Dugsiga Hoose Kaliya) | Qol-ku-Haynta | Ka Joojinta Dugsiga Gudihiisa/Heerka II /Tier II (Xarunta Taageerada) | Ka-joojin Aagga ka-baxsan Dugsiga | Eryidda/Heerka III /Tier III (Taageerada beddelkii Cayrinta |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| DEMBIYADA HEERKA I-AAD | Xadg-udubka Xeerka Lebbiska | X | X | X | X | X | | ** | |
| | Hab-dhaqan Gurracan/Xun | X | X | X | X | X | X | | |
| | Af-xumada/Cayda | X | X | X | X | X | X | ** | |
| | Daahidda, Maqnaanshaha, Gooysmada Dugsig | X | X | X | X | X | N/A Fiiri bogga 15-aad | | |
| | Khamaarka | X | X | X | X | X | X | ** | |
| | Qalabka Is-gaadhsiinta Elektarooniga ah | X | X | X | X | X | X | | |
| | Tubaakada/Sigaarka Elektarooniga ah/Cabidda sigaarka | X | X | X | X | X | X | | |
| | Been abuur/khiyaano/ Aqoonsi been abuur ah | X | X | X | X | X | X | | |
| DEMBIYADA HEERKA II-AAD | Dagaalka | X | X | X | X | X | X | X | X |
| | Kaxaynta Baabuurka si aan Sax ahayn | X | X | X | X | X | X | X | X |
| | Rab-shadeynta Baska Dugsiga | X | X | X | X | X | X | X | X |
| | Dhaqan Xumada Galmada | X | X | X | X | X | X | X | X |
| | Xoog u sheegashada, Caga-juglaynta internetka, Dhibaataynta, Han-jabaadaha | X | X | X | X | X | X | X | X |
| | Dhaga-adayg/Amar-diido | X | X | X | X | X | X | X | X |
| | Baadda | X | X | X | X | X | X | X | X |
| | Wixii Hub-U-egg | X | X | X | X | X | X | X | X |
| | Tuuganimo/Xatooyo | X | X | X | X | X | X | X | X |
| | Burburinta | X | X | X | X | X | X | X | X |
| | Xad-gudub | X | X | X | X | X | X | X | X |
| | Khiyaano/Been ka abuurka wax-qabad qof kale | X | X | X | X | X | X | X | X |
| | Adeegsiga Internetka aan la oggolayn | X | X | X | X | X | X | X | X |
| 211 8983DEMBIYADA HEERKA III-AAD | Adeegsiga, Haysashada, iibinta ama Qaybinta Khamriga | X | X | X | | | | X | X |
| | Adeegsiga, Haysashada, Iibinta ama Qaybinta Daroogada aan ahayn Tubaakada ama Khamriga | X | X | X | | | | X | X |
| | Adeegsiga, Haysashada, iibinta ama Qaybinta Hubka | X | X | X | | | | X | X |
| | Adeegsiga, Haysashada, iibinta ama Qaybinta Hubka Khatarta ah ee aan ka ahayn Hubka, Walxaha Qarxa, Qalab wax guba ama Sunta | X | X | X | | | | X | X |
| | Adeegsiga, Haysashada, Iibinta ama Qaybinta Walxaha Qarxa, Qalabka Dabka dhaliya ama Sunta | X | X | X | | | | X | X |
| | Weerarka Jirka/Jidhka | X | X | X | | | | X | X |
| | Ficil Jabiya Sharciga Dugsiga (Dagaal Xun) | X | X | X | | | | X | X |
| | Dembiyada Galmada | X | X | X | | | | X | X |
| | Digniin Been Abuur/Han-jabaadaha Bambaanada | X | X | X | | | | X | X |
| | Dhaawac Jireed oo Culus | X | X | X | | | | X | X |

FIIRO GAAR AH: ** Ka joojinta waxaa loo adeegsan karaa oggolaanshaha Kormeeraha Guud ee Aagga. Xad-gudubka ardaygu waa in uu sababay khalkhal, keenay argagax, iwm. Ha u adeegsan xad-gudubyada xeerka labiska caadiga ah.

## Heerka I-aad (Level I): Hab-dhaqannada & Xeeladaha Wax-ka-qabashada

# Qeexitaan: Heerka I-aad (Level I) - Dambiyada yar-yar.

Ikhtiyaar/fursado badan oo lagu saxayo hab-dhaqanka ardayga ayaa la dooran karaa iyada oo ay ku xirantahay baahida gaarka ah ee ardayga oo ay ku jiraan da'da iyo heerka fasalka ardayga, taariikhda hab-dhaqan xumada, iyo halista dembi kasta oo gaar ah.

| | Hab-dhaqanka la filayo | Ku Xad-gudubka Hab-dhaqanka La Filayo | Ku-xad-gudubka Hab-dhaqanka la filayo<br>*(Waxa ku jira xad-gudub kasta oo soo noqnoqda Heerka I-aad ama Heerka II-aad)* |
|---|---|---|---|
| **Noqo Bad-qab** | **Uhoggaansans harciyada ku saabsan sigaar cabista carruurta aan qaangaarka ahayn** | Adeegsiga, Haysashada, libinta ama Qaybinta Alaabooyinka Tubaakada | Adeegsiga ama haysashada alaab kasta oo tubaako ah sida sigaarka, "Dubista", tubaakada la ruuggo, ama qalabka elektarooniga ah ee sigaarka lagu cabbo. |
| | **Raac Siyaasadda Xeerka Lebiska Degmada** | Xad-gudubka Xeerka Lebiska | Nooc kasta oo lebbis ah oo ka soo horjeeda siyaasadda xeerka lebiska degmada (eeg bogga 16-aad).<br>Siyaasadda Xeerka lebbiska waxaa loogu talagalay in lagaga hortago khalkhal gelinta deegaanka fasalka, kor loogu qaado qurxinta fasalka, baabi'inta qaska iyo in la yareeyo carqaladaha ardayda kale si aysan u faragelin habka waxbarashada. |
| **Noqo mid Ixtiraam leh** | **Tixgeli dareenka dadka kale** | Hab-dhaqanka Gurracan/Xun | Akhlaaqda ka baxsan hadalka sida qof hadlaya oo laga garab-hadlo, samaynta qeylada, tuurista walxo, ciyaarta daqaalka, ciyaarta fardaha, muujinta kal-gacalka aan habboonayn ama haddii kale mashquulinta hal ama dhowr arday oo isku fasalka ah oo ku sugan deegaanka dugsiga ayaa loo qaadan doonaa carqaladayn. |
| | | Af-lagaado/Cayda | Cayda, habaaridda, ama samaynta dhaq-dhaqaaqyo fool-xun. |
| **Noqo Mas'uul** | **Uhoggaansanoow xeerarka fasalka** | Daahitaanka Maqnaanshaha Goosymada | Daahitaan: Cudurdaar la'aan soo daahitaan oo loo qorsheeyay fasallada ama dhacdooyinka (ma khusayso ardayda haysata kaarka macalinka/shaqaalaha).<br>Maqnaanshaha/Goysmada Gudsiga: Cudurdaar la'aan oo Xad dhaaf ah ka maqnaanshaha xiisadaha ama dhacdooyinka la qorsheeyay. |
| | **Muuji xirfadaha bulsho ee wacan** | Qamaarka | Ku ciyaarista lacag kasta ama alaab qiimo leh. |
| | **Joog dugsiga waqtigiisa oo imoow si joogto ah**<br>**Run sheeg** | Qalabka Isgaadhsiinta Elektarooniga ah | Si xun u adeegsiga ardayda taleefoonada gacanta, iyo aaladaha kale ee elegtarooniga ah oo ay ku jiraan ipods, mp3 player, tablets-ka oo ay ku jiraan aaladaha "u egg" ee helitaanka iyo/ama gudbinta farriimaha inta lagu jiro xilliga dugsiga.<br>(Degmada ma qaadi doonto mas'uuliyadda aaladaha wax-yeelooday luma ama la xado marka dugsiga la keeno ama ka dib markii lagala wareego ku xad-gudbida xeerka Guddigan dartiis). Ardayda waxaa laga yaabaa in loo oggolaado inay u adeegsadaan aaladaha elegtarooniga ah ujeedooyin waxbarasho. |
| | **Raac xeerarka dugsiga** | Beenabuur/khiyaano/ Aqoonsi been abuur ah | Qorista magaca qof kale ama beddelidda waqtiyada, taariikhaha, buundooyinka, baasitaanada, ama oggolaanshaha; siinta macluumaad been ah shaqaalaha degmada ama sarkaalka ilaha dugsiga. |

### Xeeladaha lagu saxo Hab-dhaqanka

**Hawlaha wanaagsan ee hab-dhaqanka el rabo**

**Shirka ardayga/waalidka**

**Dib u bar waxyaabaha laga filayo hab-dhaqanka**

**Ardayga/waalidka la samee heshiis hab-dhaqan oo ay ku jiraan 2-3 ujeedooyin hab-dhaqan ee muujinaya hab-dhaqamada laga filayo kuwaas oo lala socon doono dibna loo eegi doono**

**Ardaygu wuu ka qayb-qaataa waxqabad muuqda ee khuseeya waxbarashada cusub. U dir ardayga Kooxda Caawinta Wax-ka-qabashada hab-dhaqamada soo noqnoqda**

**** Ka-joojin ka baxsan Dugsiga (OSS)**

**(OSS) looma oggola GOOYSMADA ama Xad-gudubyada kale ee la xiriira IMAANSHAHA**

**Qol ku haynta inta uu ardaygu ka qayb-qaadanayo faragelinta hab-dhaqanka**

**(Time-Out) Meel fariisin gooni ah waxay siisaa ardayda u baahan nasasho fasalka meel bannaan oo ka mid ah dugsiga si ay u helaan taageero bulsho, dareen, iyo anshax (ee Dugsiga Hoose P.E.A.K. K-5)**

**Waqti lagu leeyahay/dayn hawleed ka baxsan waqtiga waxbarashada**

**Ka joojinta dugsiga dhexdiisa/Heerka II/Tier II (Xarunta Taageerada) inta uu ardaygu ka qayb-qaadanayo faragelinta hab-dhaqanka**

**Eedeymaha dembiga ayaa lagu soo oogi karaa**

## Qeexitaan: Heerka II-aad Heerka I-aad (Level I) ee Dembiyada soo noqnoqda ama anshax-xumada culus

## Heerka II (Level II): Hab-dhaqanka & Xeeladaha Faragelinta

Ikhtiyaar/fursado badan oo lagu saxayo hab-dhaqanka ardayga ayaa la dooran karaa iyada oo ay ku xirantahay baahida gaarka ah ee ardayga oo ay ku jiraan da'da iyo heerka fasalka ardayga, taariikhda hab-dhaqan xumada, iyo halista dembi kasta oo gaar ah.

| | Hab-dhaqanka la filayo | Ku Xad-gudubka Hab-dhaqanka La Filayo | Ku-xad-gudubka Hab-dhaqanka la filayo *(Waxa ku jira xad-gudub kasta oo soo noqnoqda Heerka I-aad ama Heerka II-aad)* |
|---|---|---|---|
| **Noqo Bad-qab** | **Si nabad ah dhibaatooyinka ku xalliya**<br><br>**Ilaali hantida dugsiga** | Dagaalka | Ka-qaybgalka labada dhinac dhacdo ku lug leh iska-horimaad jireed. |
| | | Kaxaynta Baabuurka si aan Sax ahayn | Tallaabo kasta oo ah ku xad-gudubta qawaaniinta darawalnimada ee gobolka iyo xeerarka degmada ee anshaxa ardayga ee gudaha baabuur dadweyne ama mid gaar loo leeyahay. |
| | | Baska Dugsiga/Rab-shadeynta Baabuurka Dugsiga | Hab-dhaqan aan si gaar ah loo xusin kaas oo hor istaaga nidaamka habsami u socodka iyo bad-qab u socodka basaska/baabuurta. |
| **Noqo mid Ixtiraam leh** | **Tixgeli dareenka dadka kale** | Dhaqan Xumada Galmada | Ficil kasta ama hab-dhaqan kasta oo ay ku jiraan taabashada aan la oggolaan karin ama samaynta tilmaamidda xubnaha jirkooda gaarka ah ama kuwa qof kale hadal ahaan, sawir ahaan ama qoraal ahaan. Waxaa ka mid ah anshax-xumada galmada aan haboonayn waa ficillo la xiriira taabashada hab-dhaqanka galmada, iyada oo ogolaansho laga haysto dhinaca kale ama aan laga haysan iyo haysashada agab galmo aan habboonayn. Tan waxaa ka mid ah "galmada" "sexting" kaas oo lagu qeexay dirista, wadaagga, daawashada ama haysashada sawiro, qoraal, fariimo, iimayllo ama walxo kale oo hab-dhaqn galmo ah oo elegtaroonig ah iyo ama nooc kasta oo ku jira taleefoonka gacanta ama aaladaha kale ee elegtarooniga ah. |
| | | Xoog u sheegashada: Cagajuglaynta internetka/Dhibaataynta/Cadaadiska Cabsigelin/Hanjabaado | Ficil kasta oo qoraal ama odhaah ah, tilmaamo, sawirro, sawir-gacmeedyo ama nooc kasta oo kale oo isgaarsiineed oo loo adeegsado cabsi gelinta, dhibaateynta ama handadaad qof kale waxyeelo ku salaysan isir, lab ama dheddig, caqiido diineed, dhalasho, naafo, hanuunin galmo, gacan ka hadal ka dhex dhaca xiriir xod-xodasho, ama sabab kale. |
| | | Dhaga-adayg/Amardiido | Hab-dhaqamada si weyn u dhibaateeya deegaanka waxbarasho ee hagaagsan. Diidmada in la raaco codsiga, jihaynta ama tilmaamaha qofka weyn. Dhammaan hab-dhaqamada kale ee sii xumeynaya, ka sii dara iyo/ama caasinimada aan lagu xusin nooc kale. |
| | | Baadda | Helitaanka lacag ama ballan-qaad adiga oo adeegsanaya hanjabaad ama xoog. Ardaydu waa inaysan qofka ku samayn wax aanu doonayn in uu sameeyo isaga ama iyada oo u adeegsanaya hanjabaad ama xoog. |
| | | Wixii Hub-U-egg | Haysashada, gudbinta, ama adeegsiga shay kasta oo u eg hub laakiin aan lahayn noocyada qarxa ee hubka laakiin waxaa laga yaabaa in loo adeegsado qalab xambaara birta moollada ama cadaadis hawo kaas oo lagu dhaqaajiyo shay ama walax (tusaale ahaan, qoryaha ay carruurtu ku ciyaarto, qoryaha leh koofiyadda, qoryaha BB-ga ee legeliyo walxa yar-yar ee adagg). |
| **Noqo Mas'uul** | **Weydii ka hor intaadan wax amaahan**<br><br>**Ilaali hantida dugsiga**<br><br>**Raac xeerarka dugsiga**<br><br>**Raac adeegsiga siyaasadda la oggolaan karo** | Tuuganimo/Xatooyo | Qaadashada ama kaalmaynta qaadashada qof kale hantidiisa oggolaansho la'aantiisa/la'aanteeda. |
| | | Burburinta | Burburinta ula kaca ah ama wax-yeelaynta hantida iyada oo aan fasax laga helin mulkiilaha ama qofka hantida gacanta ku haya. |
| | | Xad-gudub | Falka dhex joogitaanka hantida dugsiga fasax la'aan ama diidmada ah in laga baxo dhismaha ama hantida. |
| | | Khiyaano/Been abuur wax-qabadka qof kale | Adeegsiga, soo gudbinta ama isku dayga si aad u hesho macluumaad ama jawaabo si sharaf-darro ah. Qaadashada fikradaha ama qoraallada kuwa kale ood u soo bandhigo sidii inay yihiin kuwaaga. |
| | | Adeegsiga aan la oggolayn ama aan habboonayn ee Internetka, kombiyuutarrada ama software-ka kombuyuutarka | Tallaabo kasta oo ku xad gudubta sharciga deegaanka, gobolka ama federaalka ama Adeegsiga Siyaasadda CCS La Oggolaan karo.<br><br>Tan waxaa ka mid ah u adeegsiga internet-ka ujeeddooyin aan waxbarasho ahayn, diridda ama helitaanka macluumaadka shakhsiyeed oo ku saabsan naftaada ama dadka kale fasax la'aan, adeegsiga luuqadd aan habboonayn iyo adeegsiga shabakadda si shakhsi ahaan loogu weeraro ama loogu dhibaateeyo qof kale. |

### Xeeladaha lagu saxo Hab-dhaqanka

- Shirka ardayga/waalidka
- Ardayga/waalidka la samee heshiis hab-dhaqan oo ay ku jiraan 2-3 ujeedooyin hab-dhaqan ee muujinaya hab-dhaqamada laga filayo kuwaas oo lala socon doono dibna loo eegi doono
- Soo celinta
- Waxaa loo baahan yahay hubin maalinle ah oo leh shaqaale loo qoondeeyay ama maamul
- U dir ardayga Kooxda Kaalmada Wax-ka-qabashada hab-dhaqamada soo noqnoqda
- Qol ku haynta inta uu ardaygu ka qayb-qaadanayo faragelinta hab-dhaqanka
- Ku xiriiri ardayga hay'adaha bulshada
- PEAK (kaliya Dugsiyada Hoose, K-5) & ISS (MS & HS)
- Ka joojinta dugsiga dhexdiisa/Heerka II/Tier II (Xarunta Taageerada) inta uu ardaygu ka qayb-qaadanayo faragelinta hab-dhaqanka
- Ka-joojin ka baxsan Dugsiga iyo shaqo fasalka
- Eedeymaha dembiga ayaa lagu soo oogi karaa
- Eryidda/Heerka III/Tier III (Xarunta Taageerada) barnaamij kale oo ah beddelkii Eryidda

# Heerka III (Level III): Hab-dhaqanka & Xeeladaha Faragelinta

Qeexitaan: Heerka lll-aad (Level lll) Dembiyada soo noq-noqoshada Heerka l-aad ama Heerka ll, ee sharci-darrada ah iyo/ama anshax-xumo halis ah ama nolosha ama caafimaadka khatar gelinaya.

Ikhtiyaar/fursado badan oo lagu saxayo hab-dhaqanka ardayga ayaa la dooran karaa iyada oo ay ku xirantahay baahida gaarka ah ee ardayga oo ay ku jiraan da'da iyo heerka fasalka ardayga, taariikhda hab-dhaqan xumada, iyo halista dembi kasta oo gaar ah.

| | Hab-dhaqanka la filayo | Ku Xad-gudubka Hab-dhaqanka La Filayo | Ku-xad-gudubka Hab-dhaqanka la filayo<br>*(Waxa ku jira xad-gudub kasta oo soo noqnoqda Heerka l-aad ama Heerka ll-aad)* |
|---|---|---|---|
| **Noqo Bad-qab** | **Fiiro gaar ah u yeelo caafimaadka, nafaqeynta iyo jimicsiga**<br><br>**Iska ilaali cadaadiska xun kana fogow xaaladaha khatarta ah**<br><br>**Muhiimad sare iska saar inaad barato dadka ka soo jeeda dhaqamada kale/ jinsiyadaha/qowmiyaad ka kale** | Adeegsiga, haysashada, iibinta ama qaybinta khamriga<br><br>Adeegsiga, haysashada, libinta ama qaybinta daroogada aan ahayn tubaakada ama khamriga | Lahaanshaha, ku tiirsanaanta saamaynta, gadashada ama iibinta aalkolada ama daawooyinka sharci darrada ah. Tani waxay sidoo kale khuseysaa walax kasta oo loo sameeyay si ay ugu ekaato, ama loo matalo, daawo sharci darro ah ama aalkolo iyo wixii agab ah ee la xiriira. Ardeyda waa loo ogolyahay in ay keenaan dugsiga daawo qoran ama warqad laga soo iibsady dhakhtar kale iyaga oo haysata oggolaansho qoraal ah Waalidka/masuulka iyo oggolaanshaha iyo kormeerka dhakhtarkooda iyo maamulaha dugsiga ama wakiilka maamulaha. Ardaygu ma iibin karo ama ma siin karo dawo qoran ama laga soo iibsaday dhakhtar kale arday kale oo jooga dugsiga ama inta lagu jiro hawlaha dugsiga. |
| | | Weerarka Jirka/Jidhka | Weerar jireed ee qof kale. Wax ku dhufasho aan daan-daansi lahayn, laacid, tuurid ama haddii kale u geysasho xanuun jireed ama dhaawac qof kale oo ka baxsan macnaha guud ee iska horimaadka labada dhinac ayaa loo arkaa weerar. |
| **Noqo mid Ixtiraam leh** | **Ku cel-celi oo baro xalinta khilaafaadka iyo xanaaqa xirfadaha maaraynta**<br><br>**Adeegso xakamaynta dareenka** | Adeegsiga, Haysashada, iibinta ama Qaybinta Hubka<br><br>Adeegsiga, haysashada, iibinta ama qaybinta rasaasta ama hub khatar ah oo aan ka ahayn hubka, walxaha qarxa, qalabka wax guba ama sunta | Haysashada, gudbinta ama adeegsiga nooc kasta oo hub ah, mindi, mandiil, irbado, ul, gaas basbaas ama walxo la mid ah; naadiyada khatarta ah, sil-silad ama shay kale oo la mid ah; ama shay kasta oo loo qaadan karo hub ama hub ahaan loo adeegsan karo, ama rasaasta hub kasta oo noocaas ah. Tan waxaa ka mid ah in alaabtaas lagu haysto miiska qofka, ama sanduuqa ama meel lagu dhuunto oo ku dhex taal hantida dugsiga oo ay ku jiraan basaska/ baabuurta dugsiga ee degmada. |
| | | Adeegsiga, haysashada, iibinta ama qaybinta walxaha qarxa, agabka wax guba ama sunta | Samaynta, sababidda fal, isku dayga in la sameeyo dhaco ama haysashada nooc kasta oo ah walxaha qarxa. |
| **Noqo Mas'uul** | **Ku cel-celi oo baro masuuliyadda shakhsi ahaaneed** | Ficil ah Jabin Sharciga Dugsiga (Dagaal Xun) | Carqaladeynta dugsiga/hawlaha dugsiga iyada oo la adeegsanayo rabshado, xoog, cabsi-gelin, handadaadda arday ama shaqaale ama dhaqan xumo. Tan waxaa ka mid ah halis-gelin iyo ka caraysiinta kuwa kale ee ku wajahan falalka arbushaada ah (qof ama koox xiriir la leh). |
| | | Gubitaan ula kac ah | Dab-shidista ama isku dayga in dab la qabadsiiyo dhisme dugsi ama hanti ku taal barxadda dugsiga ama hanti kasta oo ay leedahay, kiraysato, ama amaah ay ku leedahay degmada dugsiga. |
| | | Qeylo-dhaan Dab Been ah/Hanjabaado Banbaano/ku ciyaaridda qalabka Tooska U-kiciya wadnaha (AED) | Burburinta ama wax-yeelaynta alaarmiga qaylo-dhaanta gambaleelka dabka. Samaynta hanjabaad bambaano, mid qoraal ah ama hadal ah, oo ka dhan ah dhismo dugsi kasta. Ku xad gudubka alaarmiga dabka ee qaylo-dhaanta gambaleelka waxay la macno tahay shididda alaarmiga iyada oo aanay jirin xaalad deg-degg ah.<br><br>Ku xad-gudbidda AED waxay la macno tahay in la furo sanduuqa/armaajada fasax la'aan. |
| | | Dambiga Galmada | Fal kasta oo galmo ah ama fal isku day ah oo lagu sameeyo hantida dugsiga, ama inta lagu guda jiro hawlaha dugsiga. |
| | | Dhaawac Jireed oo Culus | Dhacdo kasta oo keenta dhaawac halis ku ah nafta ama dadka kale soo gaara. Dhaawac halis ah oo jirka ah oo ku lug leh halis weyn oo dhimasho ah; miyir beel; xanuun jireed oo aad u daran; dhibaato daba-dheeraata oo muuqada; ama luminta ama tabar-yaraynta shaqada xubin jirka ah, xubin ama garashada maskaxda. |

| Xeeladaha lagu saxo Hab-dhaqanka |
|---|
| Shirka ardayga/waalidka |
| Luminta mudnaanta |
| Ka qayb-qaadashada barnaamijka Talinta xadgudubka maandooriyaha |
| U dir ardayga Kooxda Kaalmada Wax-ka-qabashada |
| Ka joojinta dugsiga dhexdiisa/Heerka II (Xarunta Taageerada) inta uu ardaygu ka qayb-qaadanayo faragelinta hab-dhaqanka |
| Ka-joojin ka baxsan Dugsiga iyo shaqada fasalka |
| Soo celinta |
| Eryidda//Heerka III/Tier III (Xarunta Taageerada) barnaamij kale ee beddelkii Eryidda |
| Eedeymaha dembiga ayaa lagu soo oogi karaa |

## Ciwaanka VI iyo Qaybta 504 Nidaamyada Cabashada

Iyada oo la raacayo sharciga federaalka iyo kan gobolka iyo xeerarka Guddiga, arday kasta ama waalidka arday kasta oo aaminsan in ardayga lagu sameeyay takoor ku salaysan isir, jinsi, jihayn galmo, diin, asal qawmiyadeed, da', aqoonsiga jinsiga ama hadalka. , abtirsiinyada, heerka qoyska, xaalad milatari ama naafanimada ayaa u soo gudbin kara cabasho aan rasmi ahayn ama rasmi ah maamulaha dhismaha. Mar kasta oo ay suurtagal tahay oo la taaban karo, xal aan rasmi ahayn ee cabashada lagu eedeeyay waa la dhiirigeliyaa waana in la isku dayayaa. Haddii xal aan rasmi ahayn oo la aqbali karo aan la heli karin, habraacyada cabashada rasmiga ah waa in loo raacaa sida ku qeexan siyaasadda Guddiga, laga bilaabo u gudbinta dacwadda maamulaha dhismaha.

## Qaybta 504 Xeerarka iyo Habraacyada

Qaybta 504 waa sharci federaal ah oo mamnuucaya takoorka ka dhanka ah dadka naafada ah. Mid ka mid ah ujeedooyinka ugu muhiimsan ee Qaybta 504 ayaa ah in la hubiyo in ardayda naafada ah aan loo diidin helitaanka xarumaha waxbarashada, barnaamijyada, iyo fursadaha iyada oo lagu salaynayo naafonimadooda. Ardayga si uu u yeesho naafo laga yaabo in lagu ilaaliyo sharcigan, isaga/iyada waa in: (1) uu leeyahay itaaldarro maskaxeed ama jireed, (2) taas oo si xad dhaaf ah u xaddidaysa, (3) hal ama in ka badan oo ah hawlo nololeed oo waaweyn. Ardayga si loogu tixgeliyo "arday u qalma" sida hoos timaada Qaybta 504, dhammaan saddexda shuruudood waa in la buuxiyaa.

Qaybta 504 waxay u baahan tahay degmadda inay siiso waxbarasho guud oo ku habboon oo bilaash ah (FAPE) arday kasta oo u qalma kaas oo qaba naafo jireed ama maskaxeed kaas oo si xad dhaaf ah u xaddidaya dhaqdhaqaaqa weyn ee nolosha. Sida ku cad qaybta 504, FAPE waxay ka kooban tahay bixinta waxbarashada caadiga ah ama khaaska ah iyo gargaarka la xiriira iyo adeegyada loo habeeyey ee loogu talagalay in lagu daboolo baahiyaha waxbarasho ee ardayga si ku filan sida baahida ardayda aan naafada ahayn loo buuxiyo oo waafaqsan Qaybta 504 shuruudaha ee la xiriirta goobta waxbarashada, qiimaynta, meelaynta, iyo ilaalinta nidaamka.

Ardayga leh, sabab ah naafo looga shakisan yahay, la rumeysan yahay inuu u baahan yahay adeegyada hoos yimaada Qeybta 504 waxaa sida caadiga ah u gudbiya waalid, mas'uul, macalin, shaqaale kale oo dugsi oo shahaado haysta, ardayga (haddii 18 jir ama ka weyn yahay), ama qof kale oo qaangaar ah oo daneynaya. ilaa heerka dhismaha 504 Iskuduwaha (sida caadiga ah lataliyaha hagaha) ee qiimaynta. Marka la helo tixraac qoraal ah, waalidka iyo ardayga waa in la siiyaa koobiga gudbinta iyo "Ogaysiinta Qaybta 504 ee Ilaalinta Nidaamka" iyo in la waydiiyo inay bixiyaan oggolaansho qoraal ah qiimeynta Qaybta 504. Marka degmadu hesho ogolaanshaha waalidka si ay u qiimeeyaan, degmadu waxay bilaabi kartaa nidaamka qiimaynta. Intaa waxaa dheer, afar iyo toban maalmood gudahooda marka la helo amarka dhakhtarka ee ku saabsan daryeelka ardayga qaba sonkorowga/macaanka, degmadu waa inay u soo dirtaa ogeysiis qoraal ah waalidka ama masuulka in ardaygu xaq u yeelan karo Qorshaha 504.

Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan siyaasadaha iyo habraacyada Qaybta 504 ee degmada ayaa laga heli karaa bogga degmada ee ah www.ccsoh.us/section504.

## Helitaanka Ilmaha

Dugsiyada Magaalada Columbus waxaa looga baahan yahay inay helaan, aqoonsadaan, oo qiimeeyaan dhammaan carruurta naafada ah, oo ay ku jiraan carruurta naafada ah ee dhigta dugsiyada gaarka loo leeyahay ee baxsan xudduudaha degmada iyo carruurta hoy-laawayaasha ah. Habka helista, aqoonsiga, iyo qiimaynta carruurta naafada ah waxaa loo yaqaan (Child Find). Dugsiyada Magaalada Columbus waxay qabtaan hawlo Helitaanka Ilmaha sannad kasta, oo ay ku jiraan boorarka iyo waraaqaha xayeysiisyada ee Maktabadaha Magaalada Columbus, Jardiinooyinka Columbus iyo Xarumaha Madadaalada, Cisbitaalka Guud ee Carruurta iyo dhismo kasta oo dugsi oo ku yaal degmada.

Ogeysiiskani waxa uu ku wargelinayaa waalidiinta diiwaanada Dugsiyada Magaalada Columbus ay horumarin doonaan oo ay ilaalin doonaan iyada oo qayb ka ah hawlaheeda Helitaanka Ilmaha. Foomka Saxiixa Waalidka iyo Ardaygu waxa uu ku wargeliyaa waalidiinta xuquuqdooda ku saabsan diiwaan kasta oo la sameeyay. Dugsiyada Magaalada Columbus waxay ururiyaan macluumaadka shakhsi ahaan lagu aqoonsan karo ilmo kasta oo ka qayb-qaata hawlaha Child Finding. Waalidiinta, macalimiinta, iyo xirfadlayaasha kale waxay siiyaan dugsiga macluumaadka la xiriira wax-qabadka waxbarashada, dhaqanka, iyo caafimaadka ilmaha. Macluumaadkan waxaa loo adeegsadaa in lagu go'aamiyo in ilmuhu u baahan yahay adeegyada waxbarashada gaarka ah iyo in kale. Macluumaadka shakhsi ahaaneed ee la aqoonsan karo ee si toos ah ula xiriira ilmaha oo uu dugsigu ilaaliyo waa diiwaanka ardayga. Diiwaanada ardayda waxaa ka mid ah diiwaanada la ilaaliyo si kasta oo ay ku jiraan, laakiin aan ku koobnay, warbaahinta kaydinta kombuyuutarka, fiidiyow muqaal ah iyo cajalad maqal ah, filim, filim yar, iyo sawirro yar-yar (microfiche). Diiwaanada uu macalinku si shaqsi ah u ilaaliyo una adeegsado ma heli karaan dadka kale iyo diiwaanada ay heli karaan oo kaliya dadka ku lugta leh daaweynta cilmi-nafsiga ah ee ilmaha ma aha diiwaanka ardayda.

## Shakhsiyaadka Naafada ee Xeerka Horumarinta Waxbarashada 2004

Hagaha Guusha Ardayga waxa uu quseeyaa dhammaan ardayda ka diiwaangashan degmada; Hagaha Guusha Ardayga waxa uu quseeyaa dhammaan ardayda ka diiwaan gashan Degmada; si kastaba ha ahaatee, ardayda naafada ah waxaa loola dhaqmi doonaa si waafaqsan shuruucda Shaqsiyaadka Naafada ah ee Sharciga Waxbarashada iyo Heerarka Hawlgelinta ee Wakaaladaha Ohio ee u adeega Caruurta Naafada ah, iyo sharci kasta oo xiga ee saameeya qodobada.

Tani qasab ma aha inay diidayso ka saarida dugsiga ama baska/baabuurta dugsiga taasoo ka dhalatay dhibaato ama xaalad deg-degg ah, ama sida sharcigu dhigayo.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqaha ardayda naafada ah, la xiriir Waxbarashada Gaarka ah iyo Adeegyada Taageerada Ardayga, ama tixraac daabacaadda, **Hagaha Xuquuqaha Waalidka ee Waxbarashada Gaarka ah** taas oo laga heli karo onlayn ama Waaxda Waxbarashada Gaarka ah ee Degmada.


### Compliance Officer

614-365-5143
complianceofficer@columbus.k12.oh.us

**Dr. Mikki Nelson,** *Executive Director,*
Office of Accelerated and Extended Learning
614-365-5206
mnelson@columbus.k12.oh.us

# Foomka Saxiixa ee Waalidka iyo Ardayga 2023-2024

*Foomkan waa tixraac kaliya. Fadlan ku buuxi boggaaga Xiriirka Waalidka

Xeerka Xuquuqaha Waxbarashada Qoyska iyo Qarsoodiga (FERPA) ayaa siiya waalidiinta iyo ardayda da'doodu tahay 18 jir ama ka weyn ("ardayda xaqa u leh") xuquuqaha qaarkood si ixtiraan leh marka la eego diiwaanka waxbarashada ardayga. Xaqqa aad u leedahay in aad ogolaato siidaynta macluumaadka shakhsi ahaaneed ee lagu aqoonsan karo ee ku jira diiwaanka waxbarashada ardayga, marka laga reebo ilaa inta sharciga dawlada dhexe iyo gobolka uu ogol yahay in la shaaciyo ogolaansho la'aan. Ka-reebitaanka waxaa lagu sheegay 34 CFR 99.31, Xeerarka Xuquuqaha Waxbarashada Qoyska iyo Sharciga Gaarka ah; Qaybt 9528, PL107-110, Ma jiro Ilmo Laga Tagay Sharciga 2001; iyo qaybta 118.125(2)(a) ilaa (m) iyo cutubka sub. (2m), Xeerarka. Mid ka reeban oo fasaxaya siidaynta ogolaanshaha la'aanteed waa siidaynta saraakiisha dugsiga ee leh danaha waxbarasho ee sharciga ah. Masuul dugsi waa qof u shaqeeya degmada maamule, kormeere, macalin, ama xubin taageero shaqaale ah (oo ay ku jiraan caafimaadka ama shaqaalaha caafimaadka iyo shaqaalaha qaybta fulinta sharciga); qof ka mid ah guddiga dugsiga; qof ama shirkad ay Degmadu heshiis kula gashay inay qabato hawl gaar ah (sida qareen, hanti-dhawre, la-taliye caafimaad, ama daaweeyaha cilmu-nafsiga); ama waalid ama arday u adeegaya guddi rasmi ah, sida guddiga edbinta ama cabashooyinka, ama ka caawinta sarkaal kale oo dugsi si uu u guto hawshiisa ama hawsheeda. Masuulka dugsigu waxa uu leeyahay dano waxbarasho oo sharci ah haddii masuulku u baahan yahay in uu dib u eego diiwaanka waxbarashada si uu u guto mas'uuliyadiisa/mas'uuliyadeeda shaqo. Marka laga codsado, degmadu waxay daaha ka qaadaysaa diiwaanada waxbarashada ogolaansho la'aan masuuliyiinta kale ee Dugsiyada Magaalada Columbus ee ardaygu rabo ama rabo inuu iska diwaan-geliyo. Sidoo kale degmadu waxay soo bandhigtaa "xogta hagaha" ogolaansho la'aan, ilaa waalidku ogaysiiyo degmada in aan la siidayn karin iyada oo aan la helin ka hori ogolaansho waalid.

## Xuquuqahaan waa:

1. Xaqa lagu baaro oo dib loogu eego diiwaanka waxbarashada ardayga 45 maalmood gudahooda ka dib maalinta dugsigu helo codsiga gelitaanka. Waalidiinta ama ardayda xaqa u leh waa in ay u soo gudbiyaan maamulaha dugsiga codsi qoraal ah oo tilmaamaya diiwaannada ay rabaan inay baaraan. Sarkaalka dugsiga ayaa samayn doona qaban-qaabada gelitaanka oo ogaysiin doona waalidka ama ardayga xaqa u leh wakhtiga iyo goobta diiwaanka lagu baari karo.
2. Xuquuqda aad u leedahay in aad codsato in wax laga beddelo diiwaanka waxbarashada ardayga ee waalidka ama ardayga xaqa u leh uu rumaysan yahay inay yihiin kuwo aan sax ahayn, marin-habaabin ah, ama haddii kale xad-gudbinaya xuquuqda gaarka ah ee ardayga ee hoos timaada FERPA. Waalidiinta ama ardayda xaqa u leh ee raba inay dugsiga ka codsadaan in wax laga beddelo diiwaanka waa inay qoraal u qoraan maamulaha dugsiga, oo ay si cad u caddeeyaan qaybta diiwaanka ay rabaan in la beddelo, oo ay caddeeyaan sababta loo beddelayo. Haddi dugsigu go'aansado in aanu wax ka badalin diiwaanka sida uu codsaday waalidka ama ardayga xaqa u leh, dugsigu waxa uu ogaysiin doonaa waalidka ama ardayga xaqa u leh go'aanka iyo xaqa ay u leeyihiin dhagaysi ku saabsan codsiga wax ka bedelka. Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan nidaamka dhageysiga ayaa la siin doonaa waalidka ama ardayga xaqa u leh marka la ogeysiiyo xaqa dhegeysiga.
3. Xaqa lagu bixiyo ogolaansho qoraal ah ka hor inta aanu dugsigu shaacin macluumaadka shakhsiga lagu aqoonsan karo (PII) ee diiwaanka waxbarashada ardayga, marka laga reebo ilaa xad ay FERPA ogolaato in la shaaciyo iyada oo aan joogto ahayn. Mid ka reeban, kaas oo ogolaanaya in la shaaciyo ogolaansho la'aan, waa siidaynta saraakiisha dugsiga ee leh dano waxbarasho oo sharci ah.
4. Xaqa aad u leedahay in aad cabasho u gudbiso Waaxda Waxbarashada Maraykanka (U.S.) ee ku saabsan guul-darrooyinka lagu eedeeyay Dugsiyada Magaalada Columbus si loo waafajiyo shuruudaha FERPA. Xafiiska ay maamusho FERPA waa:

**Family Policy Compliance Office**
400 Maryland Avenue, SW
U.S. Department of Education
Washington, DC 20202

**Xafiiska U Hogaansanaanta Siyaasadda Qoyska**
400 Maryland Avenue, SW
Waaxda Waxbarashada Maraykanka (U.S.)
Washington, DC 20202

## Foomka Aqoonsiga Waalidka/Ardayga

Waxaan dib u eegay oo kala hadlay ilmahayga dhammaan macluumaadka ku jira 2023-2024 Hagaha Guusha Ardayga ee Dugsiyada Magaalada Columbus. Waxaan u hoggaansami doonaa siyaasadaha iyo qawaaniinta ay dejiyeen Guddiga Waxbarashada Magaalada Columbus iyo filashooyinka shaqaalaha iyo maamulka dugsiga.

________________________________ ____________________
Print Student Name — Student ID Number

________________________________
School

________________ ________________ ________
Parent or Guardian — Email Address — Date

# Foomka Adeegsiga La oggolaan karo 2023-2024

*Foomkan waa tixraac kaliya. Fadlan ku buuxi boggaaga Xiriirka Waalidka

## AKOONNADA IIMAYLKA ARDAYGA

Si waafaqsan Siyaasadda Guddiga 7540.03, ardayda waxaa la siiyaa ciwaanka iimaylka ardayga iyo akoonnada ardayda si loogu adeegsado goobta waxbarashada. Akoonnada iimaylka ardayga waxaa kaliya oo loo adeegsan karaa in lagula xiriiro akoonnada iimaylka kale ee degmada iyo/ama dadka leh oggolaansho kooban oo ka baxsan goobta dugsiga. Iimaylka ardayga waxa la hayn doonaa oo kaliya ilaa 31-ka Luulyo ee sanad kasta. Taariikhdaas ka dib, iimaylada ardayga waa la tirtiri doonaa.

Fadlan ka eeg heshiiska Wakiilka/Ardayga Kombuyuutarka (Chromebook) iyo Siyaasadda Adeegsiga La Oggolaan karo wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan adeegsiga Kombuyuutarrada (Chromebooks), MacBooks-ka iyo iPads-ka ee degmadu bixiso iyo waxyaabaha laga filayo adeegsigooda.



## Ardayga:

Waan akhriyay, fahmay, oo Aqbalay Nidaamka Adeegsiga La Oggolaan Karo ee Internet-ka/Shabakadda/ Network-ga Magaalada Columbus (AUP).

Print Student Name ______________________

Student ID Number ______________________

## Parent or Guardian:

Waxaan fahansanahay in gelitaanka internet-ka/shabadhka loo adeegsado ujeeddooyin waxbarasho iyo in degmadu qaadatay foojignaano lagu tir-tiro waxyaabaha aan habboonayn oo ay oggolaatay la-socodka dhaq-dhaqaaqa ilmahayga ee onlaynka ah.

Waxaan fahansanahay in kasta oo dadaal kasta oo loogu talagalay lasocodka iyo shaandheynta, gelitaanka internet-ka ay ku jirto suurta-galnimada helitaanka agab aan ku habboonayn ardayda da'da dugsiga. Iyada oo ay degmadu bixinayso da'da ku habboon tilmaamaha bad-qabka internet-ka, adeegsade kastaa waa inuu qaataa mas'uuliyadda shakhsi ahaaneed ee adeegsigiisa/adeegsigeeda shabakada iyo internet-ka.

***FIIRO GAAR AH:** Fadlan calaamadee xulashada oo bixi saxiixaaga iyo macluumaadka aad codsatay.*

- ☐ Waxaan u-oggolaanayaa ilmahayga inuu u adeegsado intarneet-ka/ shabakadda si madax-bannaan oo ah ujeeddooyin waxbarasho.
- ☐ Waxaan u diiday ilmahayga in uu si madax-banaan u adeegsado internet-ka/shabakadda.

Parent or Guardian Signature ______________________

Date ______________________

School ______________________

Parent/Guardian Email Address ______________________

Oggolaanshahan saxiixan ayaa ahaan doona mid dhaqan galaysa inta ilmahaagu ka diiwaan-gashan yahay degmadeena. Foom cusub ayaa loo baahan yahay oo kaliya haddii waalidku codsado isbeddel.

# Oggolaanshaha Siideynta Foomka 2023-2024 Macluumaadka Ardayga

*Foomkan waa tixraac kaliya. Fadlan ku buuxi boggaaga Xiriirka Waalidka

**Fadlan hubi xulashada ku habboon mid kasta**

**Xogta Hagaha**
Xogta Hagaha waxaa lagu qeexaa magaca ardayga, lambarka aqoonsiga ardayga, ciwaanka, lambarka taleefoonka waalidka, taariikhda iyo goobta dhalashada, goobta/maadada ugu weyn ee daraasadda, ka qayb-galka hawlaha iyo ciyaaraha sida rasmiga ah loo aqoonsaday, dhererka iyo miisaanka (haddii uu yahay xubin ka mid ah kooxda ciyaaraha fudud) taariikhaha imaanshaha, taariikhda qalin-jabinta, abaal-marinnada la helay, liiska sharafeedka, iyo/ama deeqaha waxbarasho.

- ☐ Waxaan siinayaa
- ☐ Ma siinayo ogolaanshaha degmadu si ay u siidaayaan Xogta hagaha.

---

**Sawirro, Maqal, Muuqaal fiidiyow, ama Sawirro Elektaroonig ah**
Tani waxay khusaysaa sawirada, maqalka, muuqaalka fiidiyowga, ama sawirada elektarooniga ah ee ardaygaygu ugu adeegsado Dugsiyada Magaalada Columbus bandhigg, bandhigg guud, daabacaad, agab dacaayado, xayaysiis, sheeko warbaahineed, muuqaal fiidiyow, maqal, ama warbaahin kale oo elegtaroonig ah, sida internet-ka, telefishinka, CD-ROM, ama DVD. Waxaan fahansanahay in magaca koowaad iyo kan dambe ee ilmahayga sidoo kale loo adeegsan karo bandhiggaas, marka laga reebo in magaca koowaad ee ardaygayga oo kaliya lagu adeegsan doono bogga degmada, ama meelaha/hay'adaha ka baxsan degmada.

- ☐ Waxaan siinayaa ogolaanshaha adeegsiga gudaha iyo dibadda dugsiga
- ☐ Waxaan siinayaa oggolaanshaha adeegsiga gudaha dugsiga oo keliya
- ☐ Ma siinayo ogolaansho

---

**Shaqooyinka Asalka ah ee Farshaxanka iyo Qalabka Qoran**
Tani waxay khusaysaa agabyo qoraal ah oo asal ah, farshaxan, ama shaqo kale oo uu ardaygeygu ku sameeyay dibadda, bandhigg, bandhigg guud, daabacaad, agab dacaayado, xayaysiis, sheeko warbaahineed, muuqaal fiidiyow, maqal, ama warbaahin kale oo elegtaroonig ah, sida internet-ka, telefishinka, CD-ROM, ama DVD. Waxaan fahansanahay in shaqada ardaygayga Magaca koowaad iyo kan dambe sidoo lala wadaagi karo ururada ama hay'adaha ka baxsan degmada, sida COSI. FIIRO GAAR AH: Haddii ogolaanshaha la diido, diidmadan oo kale ma khusayn doonto halka agabka ardayga lagu dhex daray mid ka weyn ama ka ballaaran (sida codka ardayga lagu dhex duubay heesaha kooxda).

- ☐ Waxaan siinayaa ogolaanshaha adeegsiga gudaha iyo dibadda dugsiga
- ☐ Waxaan siinayaa oggolaanshaha adeegsiga gudaha dugsiga oo keliya
- ☐ Ma siinayo ogolaansho

---

**Oraahyo/hadallo laga soo xigtay**
Tani waxay khusaysaa bayaanada diyaarsan ee uu bixiyo ardaygayga oo leh aqoonsi suurgal ah oo ah magaca koowaad iyo kan dambe, si loogu adeegsado ujeedada daabacaadaha, sheekada wararka ama waraysiyada ku saabsan degmada.

- ☐ Waxaan siinayaa ogolaanshaha
- ☐ Ma siinayo ogolaansho

---

**Warqado qoran**
Tani waxay khusaysaa ka qayb-qaadashada hawlo qoraal ah oo qayb ka ah waayo-aragnimada waxbarasho ee dadka ka baxsan dugsiga degmada (tusaale, saaxiibbada qalinleyda, waraaqaha mahad-naqa, warqadaha qorayaasha, ama waraaqaha loo diro saraakiisha/mas'uuliyiinta guud). Warqadahaas waxaa ku jiri kara magaca koowaad iyo kan dambe ee ardayga waxaana laga yaabaa inay ku jiri kara macluumaad kale oo shakhsi ahaan lagu aqoonsan karo oo ku saabsan ardayga.

- ☐ Waxaan siinayaa ogolaanshaha
- ☐ Ma siinayo ogolaansho

______________________________
Printed Student Name

______________________________
Student ID Number

______________________________
School

______________________________
Parent or Guardian

______________________________
E-mail Address

Oggolaanshahan saxiixan ayaa ahaan doona mid shaqeeya inta ilmahaagu ka diiwaan-gashan yahay degmadeena. Foom cusub ayaa loo baahan yahay oo kaliya haddii waalidku codsado isbeddel ama haddii ilmuhu beddesho dugsiga. Oggolaanshahan saxiixan wuxuu khuseeyaa oo keliya sii deynta macluumaadka Dugsiyada Magaalada Columbus. **Urur kasta oo dibadda ka ah oo doonaya inuu adeegsado macluumaadka sida ay khusayso ardayda Dugsiyada Magaalada Columbus waa inay adeegsadaan foomkooda sii daynta.**

# Foomka Is-afgaradka ee Waalidka-Ardayga-Dugsiga

# 2023-2024

*Foomkan waa tixraac kaliya. Fadlan ku buuxi boggaaga Xiriirka Waalidka

Waalidiinta ardayda ka qaybgalaya waxqabadyada, adeegyada, iyo barnaamijyada (ay ku jiraan kuwa ay maalgeliso Ciwaanka I, Qaybta A - Arday Kasta oo ku Guulaysta Sharciga (ESSA), waxay isku raaceen in is-afgaradkiisu uu qeexayo sida waalidiinta, dhammaan shaqaalaha dugsiga, iyo ardaydu u wadaagi doonaan Mas'uuliyadda horumarinta waxbarashada ardayga, iyo siyaabaha ay dugsiyada iyo waalidiintu u dhisi doonaan oo ay u horumarinayaan iskaashiga ka caawin doona carruurta inay gaaraan heerarka sare ee Gobolka. Heshiiska Waalidka Dugsiga wuxuu dhaqan galayaa inta lagu jiro sannad-dugsiyeedka 2023-2024.

**Aniga oo ah Waalidka/Masuulka, waxaan ku taageeri doonaa waxbarashada ilmaheena ee ____________ siyaabaha soo socda:**
Dugsiga

### Sameeynta habraacyo joogto ah oo lagu taageerayo si aan u taageero guusha waxbarasho ee ilmahayga ee dugsiga

- Hubita in ilmahaygu si joogto ah u dhigto dugsiga oo uu ku tago wakhtiga loogu talagalay
- Lana soco oon ku taageero shaqada-guriga ilmahayga iyo shuruudaha akhriska
- Ka caawiyo ilmahayga inuu ilaaliyo wakhtiga jiifka ee ku haboon.
- Ilaalinta nafaqada saxda ah iyo nadaafadda

### La kulanka Shirka macalinka fasalka ilmahayga si aan ula wadaago awoodaha iyo baahiyaha ilmahayga

- Shirka Macallinka Waalidka
- Kulamada Taleefoonka
- Infinite Campus Parent Portal
- Iimaylka

Inaan la soco waxa ku saabsan waxbarashada ilmahayga oon kala xiriiro dugsiga oon oo si deg-degg ah u akhriyaa dhammaan ogaysiisyada dugsiga ama degmada dugsiga ama uu helo ilmahayga ama xagga boostada, oo aan uga jawaabo si habboon.

| Parent or Guardian Signature | E-mail Address | Date |
|---|---|---|

## Aniga oo ah arday dhigata Dugsiyada Magaalada Columbus waxaan:

- Si joogto ah inaa u aado dugsiga oo wakhtiga ku tago
- Dhammeystiro dhammaan shaqada oo aan ku soo celiyo waqtigii loogu talagalay
- Kaalmo weydiiso dugsiga iyo guriga markaan u baahdo
- Ilaaliyo dabeecad wanaag ku wajahan nafta, dadka kale, dugsiga iyo waxbarashada
- La socodsiiyo waalidka(iinta) horumarkayga dugsiga sannad-dugsiyeedka oo dhan

| Print Student Name | Student Signature | Student ID Number |
|---|---|---|

## Aniga oo ah Xubin Shaqaale ah oo ka tirsan Dugsiyada Magaalada Columbus, waxaan ku taageeri doonaa waxbarashada ilmaha hababka soo socda:

- Bixinta manhaj iyo waxbarid tayo sare leh oo ay ku jirto deegaan waxbarasho oo taageero leh oo wax ku ool ah kaas oo ka taageera carruurta si ay u buuxiyaan heerarka guusha tacliinta ee ardayga gobolka.
- Siinta waalidiinta warbixinno joogto ah oo ku saabsan horumarka waxbarasho ee carruurtooda. Fasalka kasta waxaan ku siin doonaa warbixinaha horumarka iyada oo loo marayo Shirka Waalidka/Macalinka, tusaalooyinka shaqada ardayga, cusboonaysiinta akhriska, qorista, xisaabta, iyo qiimaynta. Sidoo kale, muujinta/diyaarinta siyaabaha uu waalidku u caawin karo deegaanka waxbarashada ee guriga.
- Siinta waalidiinta fursadaha ay ku tabaruci karaan wax-qabadyada iyo dhacdooyinka dugsiga.
- Siinta waalidka suurto-galnimada ay ku heli karaan shaqaalaha.
- Ka qayb-galka waalidiinta qorshaynta, dib u eegista, iyo hagaajinta siyaasada ka qayb-qaadashada/ ku lug lahaanshaha waalidka ee dugsiga, si habaysan, joogto ah, oo hab waqtiyeysan.
- Ka qayb-qaadashada waalidiinta horumarinta wadajirka ah ee qorshe kasta ee barnaamijka dugsiga oo dhan ah.
- Qabashada kulan sanadle ah si aad waalidka ugu wargeliyo ka-qaybgalka dugsiga ee barnaamijyada Ciwaanka I, (Title I,) Qaybta A (haddii ay khusayso), iyo si loo sharaxo barnaamijyada Ciwaanka I, (Title I,) Qaybta A. Dugsigu wuxuu u qabanqaabin doonaa waalidiinta kulanka ku habboon wakhtiga.

| CCS Principal or Staff Signature/Title | School | Date |
|---|---|---|

# COLUMBUS CITY SCHOOLS

# 2023-2024

## Jadwalka Kaalendharka Sannad-dugsiyeedka Caadiga ah

### JULY 2023

| Sun | Mon | Tue | Wed | Thu | Fri | Sat |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | | | 1 |
| 2 | 3 | 4 | 5 | 6 | 7 | 8 |
| 9 | 10 | 11 | 12 | 13 | 14 | 15 |
| 16 | 17 | 18 | 19 | 20 | 21 | 22 |
| 23/30 | 24/31 | 25 | 26 | 27 | 28 | 29 |

### AUGUST 2023

| Sun | Mon | Tue | Wed | Thu | Fri | Sat |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | | 1 | 2 | 3 | 4 | 5 |
| 6 | 7 | 8 | 9 | 10 | 11 | 12 |
| 13 | 14 | 15 | 16 | 17 | 18 | 19 |
| 20 | 21 | 22 | 23 | 24 | 25 | 26 |
| 27 | 28 | 29 | 30 | 31 | | |

### SEPTEMBER 2023

| Sun | Mon | Tue | Wed | Thu | Fri | Sat |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | | 1 | 2 |
| 3 | 4 | 5 | 6 | 7 | 8 | 9 |
| 10 | 11 | 12 | 13 | 14 | 15 | 16 |
| 17 | 18 | 19 | 20 | 21 | 22 | 23 |
| 24 | 25 | 26 | 27 | 28 | 29 | 30 |

### OCTOBER 2023

| Sun | Mon | Tue | Wed | Thu | Fri | Sat |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 1 | 2 | 3 | 4 | 5 | 6 | 7 |
| 8 | 9 | 10 | 11 | 12 | 13 | 14 |
| 15 | 16 | 17 | 18 | 19 | 20 | 21 |
| 22 | 23 | 24 | 25 | 26 | 27 | 28 |
| 29 | 30 | 31 | | | | |

### NOVEMBER 2023

| Sun | Mon | Tue | Wed | Thu | Fri | Sat |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | 1 | 2 | 3 | 4 |
| 5 | 6 | 7 | 8 | 9 | 10 | 11 |
| 12 | 13 | 14 | 15 | 16 | 17 | 18 |
| 19 | 20 | 21 | 22 | 23 | 24 | 25 |
| 26 | 27 | 28 | 29 | 30 | | |

### DECEMBER 2023

| Sun | Mon | Tue | Wed | Thu | Fri | Sat |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | | 1 | 2 |
| 3 | 4 | 5 | 6 | 7 | 8 | 9 |
| 10 | 11 | 12 | 13 | 14 | 15 | 16 |
| 17 | 18 | 19 | 20 | 21 | 22 | 23 |
| 24/31 | 25 | 26 | 27 | 28 | 29 | 30 |

### JANUARY 2024

| Sun | Mon | Tue | Wed | Thu | Fri | Sat |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | 1 | 2 | 3 | 4 | 5 | 6 |
| 7 | 8 | 9 | 10 | 11 | 12 | 13 |
| 14 | 15 | 16 | 17 | 18 | 19 | 20 |
| 21 | 22 | 23 | 24 | 25 | 26 | 27 |
| 28 | 29 | 30 | 31 | | | |

### FEBRUARY 2024

| Sun | Mon | Tue | Wed | Thu | Fri | Sat |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | 1 | 2 | 3 |
| 4 | 5 | 6 | 7 | 8 | 9 | 10 |
| 11 | 12 | 13 | 14 | 15 | 16 | 17 |
| 18 | 19 | 20 | 21 | 22 | 23 | 24 |
| 25 | 26 | 27 | 28 | 29 | | |

### MARCH 2024

| Sun | Mon | Tue | Wed | Thu | Fri | Sat |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | | 1 | 2 |
| 3 | 4 | 5 | 6 | 7 | 8 | 9 |
| 10 | 11 | 12 | 13 | 14 | 15 | 16 |
| 17 | 18 | 19 | 20 | 21 | 22 | 23 |
| 24/31 | 25 | 26 | 27 | 28 | 29 | 30 |

### APRIL 2024

| Sun | Mon | Tue | Wed | Thu | Fri | Sat |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | 1 | 2 | 3 | 4 | 5 | 6 |
| 7 | 8 | 9 | 10 | 11 | 12 | 13 |
| 14 | 15 | 16 | 17 | 18 | 19 | 20 |
| 21 | 22 | 23 | 24 | 25 | 26 | 27 |
| 28 | 29 | 30 | | | | |

### MAY 2024

| Sun | Mon | Tue | Wed | Thu | Fri | Sat |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | 1 | 2 | 3 | 4 |
| 5 | 6 | 7 | 8 | 9 | 10 | 11 |
| 12 | 13 | 14 | 15 | 16 | 17 | 18 |
| 19 | 20 | 21 | 22 | 23 | 24 | 25 |
| 26 | 27 | 28 | 29 | 30 | 31 | |

### JUNE 2024


| Sun | Mon | Tue | Wed | Thu | Fri | Sat |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | | | 1 |
| 2 | 3 | 4 | 5 | 6 | 7 | 8 |
| 9 | 10 | 11 | 12 | 13 | 14 | 15 |
| 16 | 17 | 18 | 19 | 20 | 21 | 22 |
| 23/30 | 24 | 25 | 26 | 27 | 28 | 29 |

- Dhammaan Dugsiyada way u xiran yihiin Shaqaalaha iyo Ardaydaba
- Maalinta Koowaad iyo Maalinta Ugu Dambeysa Ardayda Dugsiga
- Dugsiyada way u-Xiran yihiin Ardayda; Maalinta Horumarinta Xirfadlaha
- Dugsiyada way u Xiran yihiin Ardayda; Maalinta Diiwaanka
- 30-Daqiiqo oo Lasoo Hor-baxayo
- Dhammaadka Afarta Rubac

| | |
|---|---|
| Aug. 21-22 | Maalinta Horumarinta Xirfadeed Ardayda Ma Imaanayaan |
| Aug. 23 | Maalinta Koowaad ee Ardayda |
| Sept. 4 | Dhammaan Dugsiyada way xiran yihiin Maalinta Shaqaalaha |
| Sept. 20 | Maalinta Horumarinta Xirfadeed Ardayda Ma Imaanayaan |
| Oct. 20 | Maalinta Horumarinta Xirfadeed Ardayda Ma Imaanayaan |
| Oct. 24 | Dhammaadka rubuc sanadeedka 1-aad |
| Oct. 25 | Maalinta Diiwaanada Ardayda Ma Imaanayaan |
| Nov. 7 | Maalinta Horumarinta Xirfadeed Ardayda Ma Imaanayaan |
| Nov. 20-24<br>Nov. 22 | Dhammaan Dugsiyada way xiran yihiin-Toddobaadka Fayoobida<br>Maalinta Magdhawga Shirarka Waalidka |
| Dec. 19 | 30-Daqiiqo oo Lasoo Hor-baxayo |
| Dec. 20 - Jan. 2 | Dhammaan Dugsiyada way Xiran yihiin Fasaxa Qaboobaha |
| Jan. 12 | Dhammaadka rubuc sanadeedka 2-aad |
| Jan. 15 | Dhammaan Dugsiyadu way xiran yihiin Maalinta Dr. Martin Luther King Jr. Day |
| Jan. 16 | Maalinta Horumarinta Xirfadeed Ardayda Ma Imaanayaan |
| Jan. 17 | Maalinta Diiwaanada Ardayda Ma Imaanayaan |
| Feb. 7 | Maalinta Horumarinta Xirfadeed Ardayda Ma Imaanayaan |
| Feb. 19 | Dhammaan Dugsiyada way xiran yihiin Maalinta Magdhawga Shirarka Waalidka |
| Mar. 6 | Maalinta Horumarinta Xirfadeed Ardayda Ma Imaanayaan |
| Mar. 15 | Dhammaadka rubuc sanadeedka 3-aad |
| Mar. 20 | Maalinta Diiwaanada Ardayda Ma Imaanayaan |
| Mar. 28 | 30-Daqiiqo oo Lasoo Hor-baxayo |
| Mar. 29 - Apr. 5 | Dhammaan Dugsiyada way xiran yihiin fasaxa gu'ga |
| Apr. 24 | Maalinta Horumarinta Xirfadeed Ardayda Ma Imaanayaan |
| May 27 | Dhammaan Dugsiyada way xiran yihiin Maalinta Xusuusta |
| May 30 | Maalinta Ugu Danbeysa Ardayda |
| May 31 | Maalinta Diiwaanada Ardayda Ma Imaanayaan |
| June 19 | Dhammaan dugsiyadu way xiran yihiin - Juunteenth |

Jadwalka Kaalendharka Tacliinta Dugsiyada Magaalada Columbus ee 2023-2024 ayaa dib-u-eegis lagu samayn doonaa sababo la xiriira xaaladaha deg degga ah ee ay abuurto cimilada daran, dhibaatooyinka tamarta, ama masiibooyinka kale ee guud ee ku khasba joojinta fasallada.







Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Dugsiyada Magaalada Columbus, fadlan kala soo deg Ab-keena, oo booqo ***www.ccsoh.us***

Waxaad sidoo kale jeclaan/rabi kartaa inaad wacdo 614-221-3228 ama na soo raac

**Dugsiyada Magaalada Columbus**
270 East State Street
Columbus, Ohio 43215
614.365.5000